



XAFIISKA
HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WARBIXINTA WAXQABADKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS 2025



Tusmo

EREYADA LASOO GAABIYAY iii

GOGOLDHIG..... iv

FARRIINTA HANTIDHOWRAHA GUUD vi

SOO KOOBID GUULAHA MUHIIMKA AH EE XAFIISKU GAARAY viii

1. HORDHAC xii

2. KU SAABSAN Xafiiska Hantidhowrka Guud 2

2.1. Waajibaadka Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHG) 2

2.2. Mas’uuliyadaha iyo Awoodaha XHG 3

2.3. Xiriirka XHG iyo Hay’adaha Dowladda 4

2.4. Dowlada XHG ee Xoojinta Maamulka Maaliyadeed 4

2.5. Hiigsiga, Himilada iyo Qiyamka Istaraatiijiyadeed ee XHG 4

2.5.1. Hiigsiga 4

2.5.2. Himilada 5

2.5.3. Qiyamka 5

2.6. Qaab-dhismeedka XHG 7

2.7. Shaqaalaha XHG 8

2.8. Hababka Maamul Iyo Korjoogteynta..... 9

**3. UJEEDDOOYINKA ISTARAATIIJIYADEED IYO HORUMARKA WAX-
QABADKA 11**

3.1. Soo Koobidda Horumarka Laga Gaaray Yool Kasta Oo Istaraatiijitiya-
deed 12

3.2. Waxqabadka Laga Gaaray Bartilmaameedyada..... 13

4. HAWLAHA BAARISTA IYO NATIISOOYINKA 38

4.1. Warbixinnada Baarista Ee 2025 38

4.1.1. Warbixinta Baarista Maaliyadeed..... 38

4.1.2. Warbixinta Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga..... 39

4.1.3. Warbixinta Baarista Gaarka ah 41

4.1.4.	Warbixinta Baarista Nidaamyada Tiknoolajiyadda	42
4.1.5.	Warbixinta Baarista Waxqabadka 2025.....	43
4.2.	Warbixinta Baarista Mashaariicda ay Deeq-bixiyeyaasha Maalgeliyeen, 2025.....	44
5.	HUBINTA TAYADA IYO HEERARKA MIHNADEED	44
5.1.	Hababka Xakamaynta Tayada Gudaha	44
5.2.	U Hoggaansanaanta Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhawrista Sare (ISSAs)	46
5.3.	Heerarka Anshaxa iyo U Hoggaansanaanta Xeerka Anshaxa	46
6.	la hawlgalka daneeyayaasha.....	47
6.1.	Mashruuca Taageerada XHG ee Hay'adaha Dhiggeena ah	48
6.2.	Xafiiska Hantidhowrka Qaranka Iswiidhan	49
6.3.	Bankiga Adduunka.....	49
6.4.	Midowga Yurub (EU SFA TA)	50
6.5.	Bangiga Horumarinta Afrika (AFDB)	50
7.	HORUMARINTA KARAANKA	52
8.	CASHARRADA LA BARTAY	55
9.	Qorshaha xiga iyo Hortabinnada Istaraatiijiyadda	56
10.	Khayraadka Maaliyadda	57

EREYADA LASOO GAABIYAY

Soo gaabinta	Macnaha
XHG	Xafiiska Hantidhowrka Guud
XFS	Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
JFS	Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
DFS	Dowladda Federaalka Soomaaliya
DXDF	Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka
GMM	Guddiga Miisaaniyadda Maaliyadda
ISSAIs	Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Guud
IPSAS	Halbeegyada Xisaabaadka Guud ee Caalamiga ah
SAI PMF	Hannaanka Cabbir Ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud
INTOSAI	Ururka Caalamiga ah ee Hay'adaha Sare ee Hantidhowrka
AFROSAI-E	Ururka Hay'adaha Hantidhowrka Guud ee Afrika ee ku hadla Af Ingiriisiga
EU SFA TA	Mashruuca Taageerada Farsamada ee La-xisaabtanka Maaliyadda Soomaaliya
SOMCAS	Nidaamka Uruurinta Canshuuraha Furdooyinka ee DFS
SRCS	Nidaamka Uruurinta Dakhliga ee DFS
SFMIS	Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadeed ee Soomaaliya
SCRP	Mashruuca Ka-soo-kabashada Xasaradaha ee Soomaaliya

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS



جمهورية الصومال الفيدرالية
ديوان المراقبة العامة

Federal Republic of Somalia
Office of the Auditor General of FRS

Ref.: XHG/HG-849/2025

Date: 01/03/2026

**Ku: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya,
Guddoonka Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka
Soomaaliya
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

Muqdisho, Soomaaliya

Mudanayaal,

Waxaa sharaf ii ah in aan idiin soo gudbiyo Warbixinta Waxqabadka Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee sanadka, 2025, si waafaqsan qodobka 28(1) ee Sharciga XHGS (Sharci Lr. 14 ee 2023) iyo qodobka 177 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) 2026, kaas oo dammaanad qaadaya madax bannaanida iyo waajibaadka warbixineed ee Hantidhowrka Guud. Waxaa kale oo hagaya mabaadi'da INTO-SAI-P-12, oo qeexaya in qiimaha iyo faa'iidada Hay'adaha Hantidhowrista Sare ay ku qotanto wax ka badeelka nolosha muwaadiniinta. Warbixintan ayaa muujineysa waxqabadka Xafiiska ee xoojinta daahfurnaanta, isla-xisaabtanka iyo maamul-wanaagga maaliyadda guud. Waxa ay sidaas oo kale warbixintan ka turjumeysaa caqabadaha horyaalla Xafiiska iyo in ay naga go'an tahay xoojinta maamul-wanaagga iyo xaqiijinta in kheyraadka qaranka loo adeegsado si wax-ku-ool ah oo saameyn wanaagsan leh.

Warbixintani waxa ay soo bandhigaysaa qiimaynta waxqabadka Xafiiska, waxa ay bixinaysaa talooyin lagu hago go'aan qaadashada iyo xoojinta isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda, waxaana loo diyaariyey si waafaqsan Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare (ISSAIs).

Iyada oo la raacayo qodobbada Sharciga libka Qaranka (Sharci Lr. 22 ee 2016) iyo wax-ka-beddelkiisa, Sharci Lr. 20, ee 2020, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17 ee 2019), iyo Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS (Sharci Lr. 14 ee 2023), iyo Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhawrista sare (ISSAI). Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxaa ka go'an in uu si firfircoon uga qeyb qaato dib u habaynta ku socota maaraynta maaliyadda guud, maamulka hantida, hubinta u hoggaansanaanta sharciga, iyo xaqiijinta in hay'adaha dowladdu u gutaan awoodooda sharciyeed si u adeegaysa dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Waxa aan halkan ku muujinayaa mahadcelin ballaaran oo aan u jeedinayo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Golaha Baarlamaanka Federaalka taageerada joogtada ah ay u muujiyeen Xafiiska Hantidhowrka Guud. Waxa aan sidoo kale si gaar ah u bogaadinayaa iskaashiga farsamo ee joogtada ah iyo taageerada ay bixiyeen bahwadaagteenna iyo daneeyayaasha, kuwaas oo horseeday wada-shaqeyn wax-kool ah isla markaana door muhiim ah ka qaatay horumarka uu gaaray Xafiiska. Xafiisku waxaa marwalba ka go'an ilaalinta madaxbannaanidiisa dastuuriga ah iyo midda sharciyeed, isaga oo isla markaana xoojinaya waxqabadka, tayada baarista, iyo kalsoonida dadweynaha ee isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda.

Fadlan iga guddooma qaddarin iyo tixgelin aad u sarreysa.

Axmed Ciise Guutaale
Hantidhowrka Guud
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

FARRIINTA HANTIDHOWRAHA GUUD



Aniga oo gudanaya waajibka ku xusan qodobka 28aad ee Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud, iyo Qodobka 177(8) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya (JFS) 2026 oo faraya hannaanka gudbinta Warbixinta Waxqabadka XHG ee sanadlaha ah, sidaas darteed, waxa aan si rasmi ah halkan ula wadaagayaa Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS, iyo Ra'iisul Wasaaraha XFS Warbixinta Waxqabadka Sanadlaha ah ee XHG ee 2025.

Warbixintani waxa ay ka kooban tahay (71) bog iyo 9 qeybood, waxa ayna si faah-faahsan u iftiiminyesaa guulaha, gaabisyada caqabadaha iyo fursadaha XHG ee sanadka 2025, sidoo kale waxa ay wax ka tareysaa qiimeynta waxqabad-

ka XHG, taas oo ka caawinaysa daneeyeyaasha sida hay'adaha dowladda, Baarlamaanka, Bahwadaagta Horumarinta (development partners), Saxaafadda iyo Bulshada Rayidka in ay fahmaan Waxku oolnimada kaalinta korjoogteynta, waxqabadka iyo waxtarka Warbixinnada Xafiiska Hantidhowrka Guud ee xoojinta dowlad wanaagga, dakhliga iyo hubinta saxnaanta maalmulka maaliyadda guud.

Warbixintu waxa ay tilmaamaysaa dhi-nacyada horumarka laga gaaray, waxayna madaxda sare ee dowladda ku biirinaysaa talooyin muhiim u ah gaarista go'aannada la xariira hubinta in dakhliga dowladda loo adeegsaday si wax-ku-ool ah iyo in si u adeegeysa Qaranka loo maareeyey kheyraadka dalka, taas oo xoojinaysa kalsoonida dadweynaha iyo hufnaanta hay'addaha dowladda.

Sanadka 2025, XHG waxa uu gaaray Guulo muhiim ah oo ay kamid yihiin

1. Sare u qaadidda Baaxadda Hantidhowrista iyo Warbixinta;
2. Dhisidda Karaanka iyo Mihnadda
3. Xoojinta hawlgalka daneeyeyaasha

Iyada oo la fulinayo waajibaadka ku xusan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Lr. 17 ee 2019 iyo Sharciga Xafiiska Hanti dhowrka Guud JFS, Lr. 14 ee 2023, Xafiiska waxa uu sannadkii 2025 fuliyay laba baaritaan oo waxqabad (Performance Audits) ah, kuwaas oo kala ahaa:

1. Baarista Waxqabadka ee Adeegyada La Siiyo Maxaabiista Ku Jirta Xabsiga Dhexe ee Xamar
2. Baarista Waxqabadka ee Adeegyada

Daryeelka Caafimaadka Hooyada ee ay Bixiso Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee DFS iyada oo baaxadda baaristu daboolaysay muddada u dhaxeysay 2020 ilaa 2024.

Si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, XHG waxa uu sanadkii 2025 hormariyey hannaanka Baarista iyo Dabagalka Nidaamyada Tiknoolajiyadeed (IS Audit) oo lagu sameeyay nidaamyada muhiimka ah ee dowladda sida

1. Nidaamka Diiwaangelinta Ganacsiga Soomaaliyeed (SBRS) ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha,
2. Nidaamka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada (EMIS)/Guddiga Imtixaanaadka Qaranka (SONEB) ee Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare,
3. Nidaamka Macluumaadka Maareynta Caafimaadka (HMIS) ee Wasaaradda Caafimaadka, Daryeelka Bulshadda,
4. Nidaamka Maareynta Aqoonsiga Qaranka ee Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka (NIRA).

Sidoo kale XHG waxa uu fuliyey baarista 22 mashruuc oo uu maalgeliyey Bankiga Adduunka, waxa uuna soo saaray talooyin wax-ku-ool ah si loo hubiyo hufnaanta, adeegsiga lacagaha deeq-bixiyeyaasha, taas oo gacan ka geysanaysa xoojinta iyo maareynta maaliyadda guud.

Xafiiska Hantidhowrka Guud isaga oo ka duulaya mabda'a xoojinta xiriirka ka dhexeeya Xafiiska iyo dadweynaha waxa uu sanadkan 2025 qabtay kulamo wacyigelineed, iyo aqoon-is-weydaarsiyo lagula wadaagayay Warbaahinta, dadweynaha iyo hay'adaha dowladda faahfaahin ku saabsan hab-raacyada baarista iyo dhaqangalka Sharciga Hantidhowrka (Sharci Lr. 14, 2023).

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu Si waafaqsan Qodobka 11aad ee Sharci Lr. 17, 2019 iyo Qodobka 5aad (9) ee Sharci Lr. 14, diiwaangeliyay 1,465 Qandaraas/Heshiis, 18 Sharci, 75 Xeerar iyo 3 qaraar oo ka soo baxay Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha XFS. Tallaabadan ayaa xoojisay ku dhaqanka sharciga, hufnaanta maamulka, iyo isla-xisaabtanka go'aannada maaliyadeed ee dowladda.

Intaa waxaa dheer, Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu xoojiyey iskaashiga iyo taageerada farsamo ee uu siiyo Xafiisyada Hantidhowrka Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya (DXDF), si waafaqsan Qodobka 5(4) Lr. 14 ee 2023 iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Lr. 17 ee 2019, kuna jaan-go'an yoolka 7aad ee istaraatiijiyadda 2023-2027 ee Xafiiska.

Waxa aan si weyn u bogaadinayaa dadaalka iyo xirfadda hawl-wadeenadeenada xafiiska oo laf-dhabar u ahaa guulahan, waxa aan sidoo kale u mahadcelinayaa Baarlamaanka FS, Madaxweynaha JFS iyo Xukuumadda oo si waxtar leh u taageereeyey fulinta howlgalka Xafiiska Hantidhowrka Guud.

Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa bahwadaagta horumarinta iyo daneeyeyaasha kaalinta muhiimka ah ee ay ka qaateen bixinta taageerada farsamo, taas oo wax weyn ka tartay horumarinta kartida shaqaalaha, xoojinta heerarka mihnadeed, iyo tayeynta agabka hantidhowrista

"Xafiiska Hantidhowrka Guud, Waxa uu leeyahay Qorshe Istaraatiijiyadeed 2023-2027, kaas oo nagu hagaya casriyeynta Mihnadda iyo hirgelinta heerarka caalamiga ah ee hay'adaha Hantidhowrista Sare"

***Mudane: Axmed Ciise Guutaale
Hantidhowraha Guud, JFS***

SOO KOOBID GUULAHA MUHIIMKA AH EE XAFIISKU GAARAY

Warbixintan Waxqabadka Sanadlaha ah waxa ay soo bandhigaysaa guulaha muhiimka ah ee Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee sanad-warbixineedka 2025. Warbixintaan waxaa loo diyaariyey si waafaqsan Qodobka 28(1) ee Sharciga Hantidhowrka (Lr. 14 ee 2023) waana mid la jaanqaadaysaa Qorshaha Istaraatiijiyadda 2023–2027 Warbixintu waxa ay iftiiminaysaa horumarka laga sameeyay fulinta waajibaadka dastuuriga ah ee XHG, si sare loogu qaado isla-xisaabtanka, hufnaanta, iyo maaraynta wanaagsan ee kheyraadka dadweynaha. Si kooban, Xafiisku waxa uu gaaray 4-tan guulood ee soo socda:


1. Sare u qaadidda Baaxadda Hantidhowrista iyo Warbixinta

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu markii ugu horreysay si guul ah u soo saaray 37 warbixin baaris, taas oo ka dhigan tallaabo wax ku ool ah oo xafiisku qaaday, isla markaana ka tarjumaysa baaxadda hantidhowrista qeybaha kala duwan ee baaritaannada oo ay ka mid yihiin Maaliyadda, U-Hoggaansanaanta Sharciga, Waxqabadka, Nidaamyada Macluumaadka, Fatashka, Baaritaannada Gaarka ah iyo Dabagalka.

Kororka warbixinnada la soo saaray waxa ay muujinaysaa hababka qorsheyn-ta, fulinta, kormeerka iyo hubinta tayada oo la xoojiyay, iyada oo la raacayo Qorsho-sanadeedka Guud ee Baarista iyo Qorshaha Istaraatiijiyadda 2023-2027.

Halka sanadkii 2024 XHG uu soo saaray 30 warbixin baariseed kuwaas oo daboolayay baarista Maaliyadda, U-Hoggaansanaanta Sharciga, Waxqabadka, Nidaamyada Macluumaadka, Baaritaannada Gaarka ah iyo Mashaariicda ay Dee-q-bixiyeyaa-sha Maalgeliyeen.

WARBIXINNADA BAARISTA HANTIDHOWR EE LA SOO SAARAY - 2025



2. Dhisidda Karaanka iyo Mihnadda

Dhismaha karaanka xafiiska ayaa dowl muhiim ah ka qaata xoojinta waxtarka hantidhawrka iyo joogteynta. Intii lagu guda jiray sanad warbixineedka, XHG waxa uu sii waday hirgelinta barnaamijyada tababarka habaysan, bixinta shahaadooyin xirfadadeed iyo dib-u-habaynta xafiiska si loo xoojiyo wax ku oolnimada kartida hantidhowrista iyo takhasuska.

Tirada shaqaalaha ka faa'iidaystay tababarro iyo barnaamijyo kobcinta karaanka ee dibada lagu qabtay ayaa gaartay 55 shaqaale sannadka 2025, dhanka kale, sanadkii 2024 in ka badan 40 shaqaale oo tababarro dibadda ah ka qeyb galay. Kororkani waxa uu muujinayaa mudnaanta uu Xafiisku siinayo dhismaha karaanaka shaqaalaha si kor loogu qaado tayada iyo waxtarka shaqada.

Dadaallada xirfadeed waxa ay diiradda saareen ballaarinta aqoonta shaqaalaha iyada oo la raacayo shuruudaha Horumarinta Xirfadeed ee Joogtada ah (CPD) iyo qaab-dhismeedka kartida ee la xiriiira Hannaanka Dhismaha Karaanka Hay'adda (ICBF).

Sanadkii 2025, XHG waxa uu qaatay 6 shaqaale oo cusub si loo xoojiyo awoodda Xafiiska iyo karaanka shaqaalaha, halka uu Sanadkii hore ee 2024, XHG waxa uu qaatay 25 shaqaale.

TAYEYNTA KARTIDA & TABABARRADA SAI SOMALIA 2025

19

TABABARRADA LA QABTAY

Kartida Shaqaalaha & Tayada Baarista oo Kordhay

11

TABABARRADA LA JOOJIYAY

Xaddidaadda Miisaaniyadda, Isku Dhaca Jadwalka, Cidhiidhiga Kartida

GUULAHA MUHIIMKA AH EE TAYEYNTA KARTIDA

WAXQABADKA & U-HOGGAANSANAANTA

ISBEDDELKA DIJITAALKA & KORMEERKA IFMIS

BAARISTA WARSHADAHAA KAADHIFKA KHEYRAADKA

XIRIIRKA DANEYYAYAASHA

MAARAYNTA ISTARAATIJIYADEED

3. Xoojinta hawlgalka daneeyayaasha

Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu si joogta ah u xoojiyaa wada shaqeynta Baarlamaanka, Fulinta, hay'adaha la baaro, Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDF), saaxiibada horumarinta iyo warbaahinta. Hababka wada shaqeynta daneeyayaasha waxaa ka mid ah gudbinta rasmiga ah ee warbixinnada hantidhowrka, warbixinnada farsamo, war saxaafadeed, han-naanka wacyigelinta dadweynaha iyo ka qeybgalka madallada wada shaqeynta.


XOOJINTA ISLA-XISAABTANKA IYO HUFNAANTA



4. Diawaangelinta Qandaraasyada, Heshiisyada, Sharciyada & Xeer-nidaamiyayaasha

Iyada oo la raacayo waajibaadka sharci ee ku xusan Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud iyo sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, XHG waxa uu si joogta ah u fuliyaa shaqadiisa iyada oo la adeegsanayo diiwaangelinta iyo dib-u-eegista qandaraasyada dowladda, heshiisyada, sharciyada iyo xeer-nidaamiyayaasha. Intii lagu guda jiray sanadka warbixinta, 1,465 qandaraas iyo heshiis, 18 sharci, 75 xeer-nidaamiye iyo 3 qaraar ayaa la diiwaangeliyay. Halka sanadkii 2024 la dii-wangaliyay 856 qandaraas/heshiis, 6 sharci iyo 166 xeer oo ka soo baxay Madaxweynaha JFS iyo Ra'isul Wasaaraha XFS.

GUULAHA MUHIIMKA AH EE DIIWAANGELINTA




Caqabadaha ugu Waaweyn

In kasta oo sanadkan horumar la taaban karo la gaaray, haddana caqabado dhowr ah oo saameeyay in si buuxda loo hirgeliyo hawlaha la qorsheeyay oo dhamma 162 waxqabad, , 57% hawllood ee qorshaha sanadlaha ah ayaa la dhammeystiray, iyada oo ay jiraan hawlo dhowr ah oo socda ama aan la billaabin oo kadhigan 43% . Xaddidaad dhaqaale ayaa saameysay in hawlo muhiim ah lagu hirgeliyo waqtigii loogu talagalay, kuwaas oo ay ka mid yihiin: in la dhiso shaybaarka baarista fatashka oo dhijitaal ah, horumarinta kaabayaasha Xogta Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda (ICT), iyo dadaallada xirfadeynta. Intaa waxaa dheer, dhowr aqoon-is-weydaarsi oo tababar-goboleed sannadla ah ayaa dib loo dhigay sababo la xiriira Xaddidaad dhaqaale.

Hadii aan dib u milicsano sanadkii 2024 hawlaha la qorsheeyay oo dhamaa 127 waxqabad, halkaas oo ay ka qabsoomeen 61% halka ay qabsoomin sidii loogu tala galay 39%.

Caqabadahani waxa ay muujinayaan baahida loo qabo in sare loo qaado odoroska dhaqaale, qoondaynta miisaaniyada wax ku ool ah, iyo qorsheynta hirgelin heerar kala duwan leh, si loo hubiyo in ujeedooyinka istaraatiijiyadda ay waafaqsan yihiin dhaqaalaha la heli karo.

Xafiisku waxa uu si joogta ah uga shaqeeyaa in uu yareeyo khataraha jira si mudnaan loo siiyo hawlaha baaritaannada muhiimka ah, tallaabooyinka hufnaanta gudaha iyo la hawlgalka saaxiibada horumarinta si loo taageero dadaallada dib-u-habaynta xafiiska.



1. HORDHAC

Warbixintaan Waxqabadka Sannadlaha ah ee 2025 waxay soo bandhigaysaa guulaha iyo waxqabadka Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya muddadi lagu gudda jiray warbixin sannadeedka 2025. Warbixintani waxaa loo diyaariyey si waafaqsan Qodobka 28(1) ee Sharciga Hantidhowrka Guud Lr. 14 ee 2023, iyo Qodobka 114 ee Dastuurkii Ku-meel-gaarka ahaa 2012 (sababta oo ah xiliga warbixinta waxaa dhaqan gal ahaa Dastuurka Ku-meel-gaarka ah), waxayna muujinaysaa horumarka laga gaaray fulinta waajibaadka dastuuriga ah ee XHG ee ku aaddan xoojinta isla xisaabtanka, daah-furnaanta, iyo maareynta hufan ee khayraadka guud.

Intii lagu guda jiray sannadkii 2025, XHG waxa uu sii xoojiyay doorkiisa hantidhowriseed, isaga oo ballaariyay baaxadda baarista isla markaana kor u qaaday tayada baarista. Waxa uuna soo saaray wadar ahaan 37 warbixin baaris ah, kuwaas oo Kala ah ; Baarista Maaliyadeed, u hoggaansanaanta sharciga, waxqabadka, nidaamyada macluumaadka, Baaris gaar ah, iyo Warbixinada dabagalka Baarista. Baarisyaddani waxa ay siiyeen xaqiijin madax-bannaan Baarlamaanka, Laanta Fulinta, iyo dadweynaha oo ku saabsan maareynta hantida guud iyo waxqabadka barnaamijyada dowladda, taas oo taageertay go'aan-qaadasho xog-ogaal ah iyo kormeer wax ku ool ah.

Horumar muuqda ayaa laga sameeyay xoojinta tayada baarista iyo heerarka xirfadeed. Habraacyada baarista, Buug-tilmaameedyada Baarista, iyo Hagayaasha Baarista ayaa la sameeyay ama la cusboonaysiiyay si waafaqsan heerarka caalami-ga ah, waxaana la xoojiyay habraacyada hubinta tayada gudaha. Isticmaalka warqadaha shaqada ee nidaamsan, dib-u-eegista kormeerka, iyo xakamaynta tayada ee nidaamsan ayaa kor u qaaday isku halaynta, joogtaynta, iyo kalsooniida natiijooyinka baarista.

Horumarinta Mihnadda karaanka hay'adda waxa ay inoo tahay mudnaan muhiimad gaar ah leh. XHG waxa uu horumar ka sameeyay dib-u-habaynta shaqaalaha iyadoo la sameeyay qaab-dhismeed hay'adeed oo cusub, barnaamijyo iyo tababaro waxtar leh, iyo barnaamijyo shahaado xirfadeed oo loogu talagalay baarayaasha.

Ka qaybgalka shaqaalaha ee shabakadaha xirfadeed ee heer gobol iyo heer caalami waxay ka caawisay horumarinta xirfadaha, is-dhaafsiga aqoonta, iyo qaadashada hababka shaqo ee wanaagsan. taas oo gacan ka geysatay xoojinta iyo horumarinta joogtada ah ee hay'adda.

La-hawlgalka daneeyayaasha iyo daah-furnaanta ayaa sidoo kale la xoojiyay, iyadoo la hagaajiyay habka faafinta iyo xiriirka natiijooyinka baarista. XHG waxa uu xoojiyay xiriirka uu laledahay baarlamaanka, laanta Fulinta, hay'adaha la baaray, bah-wadaagta horumarinta, bulshada rayidka, iyo warbaahinta. Natiijooyinka baarista ayaa lagu faafiyay warbixinno rasmi ah, kulamo sharaxaad, war-saxaafadeedyo, iyo soo koobitaanno u fudud akhristayaasha, taas oo kor u qaaday helitaanka macluumaadka dadweynaha isla markaana taageertay dabagalka talooyinka baarista.

Guulaha weyn ee la gaaray sannadka gudihiisa waxay ahayd xoojinta diiwaangelinta heshiisyada, qandaraasyada, iyo dukumentiyada sharci ee dowladda. Iyadoo la raacayo shuruucda khuseeya, XHG waxa uu diiwaangeliyay 1,465 qandaraas iyo heshiis, 18 sharci, 73 xeer, iyo 3 wareegto. taas oo xoojisay u hoggaansanaanta sharciga, daahfurnaanta, iyo isla xisaabtanka ee ballanqaadyada maaliyadeed ee dowladda.

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS iyo Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedyada (FMS-XHG) ayaa saxiixay heshiis iskaashi oo lagu xoojinayo maareynta maaliyadda guud iyo mideynta habraacyada baarista ee dalka oo dhan. Heshiiskan wuxuu caddeynayaa doorarka iyo waajibaadka, wuxuu hagayaa baaritaanno wadajirka ah, wuxuuna ujeedkiisu yahay xoojinta kormeerka qaybta guud iyadoo la ilaalinayo madaxbannaanida hay'ad kasta. Hawlaha bilowga ah ee heshiiska waxa ay diiradda saarayaan dhisidda awoodda xirfadeed, hagaajinta tayada baarista, iyo kor u qaadidda isla xisaabtanka wadajirka ah ee maareynta khayraadka guud ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed. Diiradda sannadka 2026 waxa ay noqon doontaa fulinta heshiiska, oo ay ku jirto qorshaynta baarista wadajirka ah iyo diyaarinta qorshe hawleed faahfaahsan.

Inkasta oo ay jiraan caqabado la xiriira xaddidaadaha khayraadka iyo awoodda, XHG waxa uu ilaaliyay madaxbannaanidiisa hay'adeed waxa uuna sii wadday hirgelinta dib-u-habaynta mudnaanta leh. Guud ahaan, waxqabadka la gaaray muddada warbixinta waxa ay muujinaysaa horumar joogto ah oo ku wajahan yoolalka Qorshaha Istaraatiijiga ah 2023-2027, wuxuuna ka tarjumayaa sida ay uga go'an tahay XHG xoojinta maareynta maaliyadda guud, isla xisaabtanka, iyo maamul wanaagga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. KU SAABSAN XAFIISKA HANTID-HOWRKA GUUD

Xafiiska Hantidhowrka Guud waa hay'ad madax-bannaan, waana hay'adda ugu sarreysa ee Baarista Hantida Dowladda Federaalka. Waxaana sharci ahaan loo igmayday xoojinta daahfurnaanta, isla xisaabtanka, maareynta wanaagsan ee isticmaalka hantida danta guud, iyada oo la raacayo sharciyada dalka iyo heerarka caalamiga ah ee hay'adaha hantidhowrista sare.

XHG waxa uu ku dhisan yahay qiyam iyo aragtiyo istaraatiiji ah oo ku saleysan isla-xisaabtan iyo maamul wanaag, taas oo dhiirrigelinaysa daahfurnaanta mas'uuliyadeed ee Hay'adaha Dowladda oo saameyn togan ku leh horumarinta dhaqan-dhaqaale ee bulshada Soomaaliyeed, sarena loogu qaado kalsoonida ay ku qabaan hay'adaha dowladda.

2.1. Waajibaadka Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHG)

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hay'ad dastuuri ah, madax-bannaan oo heer federaal ah, kuna dhisan Qodobka 114aad ee Dastuurka ku-meel-gaarka ah ee JFS, iyada oo awoodahiisa, waajibaadkiisa iyo shaqooyinkiisa lagu faahfaahiyey Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Lr. 17, 2019, iyo Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud, Lr. 14, 2023.

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waa hay'adda ugu sarreysa ee u xilsaaran hantidhowrista, diiwaangelinta, ilaalinta hantida danta guud iyo macaamilka maaliyadeed ee dowladda, sidoo kalena fulisa kormeer iyo daba-gal ku saabsan maareynta kheyraadka guud, si waafaqsan qodobbada Sharciga Hantidhowrka.

Marka uu gudanayo waajibaadkiisa, Xafiiska Hantidhowrka Guud waa ka madax-bannaan yahay dhammaan laamaha kale ee dowladda, waxa uuna u hoggaansamaa Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka, waxa uu diiwaan-geliyaa dhammaan Qandaraasyada, heshiisyada, shuruucda, xeerarka, deeqaha, deymaha, damaanadaha, kala wareejinta miisaaniyadda iyo dikreetooyinka Ra'iisul Wasaaraha iyo Madaxweynaha JFS, sidoo kalena waxa uu bixiyaa talooyinka ku saabsan dhowrista iyo ku dhacanka Sharciga iyo Miisaaniyadda dowladda.

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu ilaaliyaa mabaadi'da maamul-wanaagga, hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka, si waafaqsan Sharciga Hantidhowrka, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharciga libka Qaranka Lr. 22, 2016 iyo wax-ka-beddelkiisa Lr. 20, 2020, sharciyada kale ee khuseeya iyo heerarka caalamiga ah ee hay'adaha hantidhowrista sare.

2.2. Mas'uuliyadaha iyo Awoodaha XHG

Sharciga XHG waxa uu ku waajabinayaa mas'uuliyado iyo waajibaad dhameystiran Xafiiska Hantidhowrka Guud, kuwaas oo la xiriira hantidhowrista, kor-joogteynta, iyo ka warbixinta miisaaniyadda dowladda, u-hoggaansanaanta sharciga, waxtarka iyo hufnaanta hay'adaha dowladda, si loo xaqiijiyo in hantida dadweynaha loo adeegsado si waafaqsan sharciga iyo mabaadi'da anshaxa maaliyadeed. XHG waxa uu si gaar ah u leeyahay waajibaadkan soo socda:

1. **Baarista Maaliyadeed** – XHG waxa uu sameeyaa baaris maaliyadeed, waxa uuna dib-u-eegis ku sameeyaa xisaabaadka iyo warbixinnada maaliyadeed ee hay'adaha dowladda, marka uu u soo gudbiyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda, si loo xaqiijiyo saxnaanta iyo waafaqsanaanta sharciyada maaliyadeed ee dalka.
2. **Baarista U-hogaansanaanta Sharciga** – XHG waxa uu baaris hantidhowr ku sameeyaa heerka ay hay'adaha dowladda ugu hoggaansan yihiin xeerarka iyo shuruucda maaliyadeed ee dalka iyo kuwa kale ee ay lagama maarmaanka tahay dhaqangelintoodu.
3. **Baarista Waxqabadka** – XHG waxa uu qiimeeyaa sida kheyraadka dowladda loo isticmaalay iyo in ay ku filnaayeen wax-soo-saarka iyo waxtarka la filayo, isaga oo odoros cad ka bixiya hannaanka wax-qabadka hay'adaha dowladda.
4. **Baaritaanada Gaarka ah** – XHG waxa uu baaritaanno gaar ah ku samayn karaa hay'adaha dowladda, si loo hubiyo isla xisaabtanka iyo hufnaanta, gaar ahaan marka baaritaannada sanadlaha ah ay muujiyeen khataro gaarka ah ama kuwo dabiici ah oo aan si ku filan wax looga qaban iyo marka ay soo baxaan arrimo kale oo aan weli la hubin una baahan baaritaan degdeg ah.
5. **Baarista Fatashka (Forensic Audit)** – Xafiisku waxa uu sameeyaa Baaris Fatash oo la xiriirta marka ay soo baxaan tuhunno musuq-maasuq, xatooyo xoolo dadweyne, khiyaano ama maamul xumo ka dhacday hay'adaha dowladda dhexdooda.
6. **Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS Audit)** – XHG waxa uu baaris ku sameeyaa oo hubiyaa nidaamyada tiknoolajiyadda ee loo adeegsado maamulka, diiwaangelinta iyo maareynta maaliyadda dowladda, si loo xaqiijiyo ammaanka xogta iyo hufnaanta maamulka nidaamyadaas.
7. **Baarista Mashaariicda** – XHG waxa uu baaris hantidhowr iyo qiimeyn ku sameeyaa mashaariicda dowladda ee ay bixiyaan deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah, si loo hubiyo in ay ku socdaan si waafaqsan heshiisyada la galay, qorshayaa-sha la dejiyay iyo shuruucda khuseysa ee dalka.

2.3. Xiriirka XHG iyo Hay'adaha Dowladda

Si loo xoojiyo isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta, sharciyada dalku waxa ay XHG ku waajibinayaan in uu warbixinnada hantidhowrka u gudbiyo Ra'iisul Wasaaraha XFS, Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo Madaxweynaha JFS. Warbixinnadan waxa ay suurto-gelinayaan in hay'adaha dowladda ay helaan xog sax ah oo ay uga go'aan gaari karaan maareynta iyo maamulka maaliyadeed ee dalka, iyada oo warbixinnadaas ay ka helayaan natiijooyinka lagu ogaaday baaritaannadii la sameeyey iyo talooyinka uu XHG soo jeediyey.

Haddii baaritaannada XHG ay muujiyaan wax caddeyn ah oo tilmaamaysa tuhun fal-dambiyeed dhacay, XHG waxa uu awood u leeyahay in uu natiijooyinka baarista u gudbiyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, si looga qaado tallaabo sharciga waafaqsan. Tani waxa ay xoojinaysaa isla-xisaabtanka iyo la dagaallanka musuq-maasuqa ama dembiyada kale ee ka dhex dhaca hay'adaha dowladda.

2.4. Dowladda XHG ee Xoojinta Maamulka Maaliyadeed

Marka Xafiiska Hantidhowrka Guud uu si buuxda u guto waajibaadkiisa waxa uu:

- › Sare u qaadaa isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta dhammaan hay'adaha dowladda.
- › Kobciyaa kalsoonida shacabka ee nidaamka dowladda.
- › Xoojiyaa daahfurnaanta maareynta maaliyadda guud.
- › Hubiyaa in kheyraadka dadweynaha si hufan, dhexdhexaad ah, oo daacadnimo leh loo isticmaalay.

Isaga oo saldhig u ah qaab-dhismeedka dowladnimada Soomaaliya, XHG waxa uu dowlad muhiim ah ka qaataa horumarinta mabaadi'da maamul wanaagga, hufnaanta hay'adaha, iyo horumarka waara.

2.5. Hiigsiga, Himilada iyo Qiyamka Istaraatiijiyadeed ee XHG



2.5.1. Hiigsiga

Hiigsiga XHG waa: “in uu noqdo xafiis hantidhowr oo lagu kalsoonaan karo, madax-bannaan, wax-ku-ool ah, qeybna ka qaata sare-u-qaadidda daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka ku aaddan adeegsiga hantida dowladda”.

Hiigsigeenna kama-dambaysta ah waa in aan noqonno hay'ad u heellan kor-u-qaadidda isla-xisaabtanka, daahfurnaanta iyo hufnaanta guud. Waxaa uuna sameeyaa horumar joogto ah annaga oo hiigsanayna in aan noqono hay'ad la isku hallayn karo, marka la joogo maamul-wanaagga. Hiigsigeennu keliya ma aha in aan daba-galno hay'adaha dowladda, balse waxa si adag nooga go'an in aan noqonno xafiis ku dadaala isla-xisaabtanka gudihiisa, iyo in aan si joogto ah u ilaalinno daahfurnaanta, hufnaanta iyo waxtarka hawl-qabadkeenna.



2.5.2. Himilada

Himalada XHG waa: “in uu diyaariyo, soona saaro warbixinno hantidhowr oo tayo sare leh oo loo gudbiyo Baarlamaanka iyo Madaxweynaha, si kor loogu qaado daahfurnaanta iyo la-xisaabtanka Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyada oo la ilaalinayo danta muwaadiniinta Soomaaliyeed”.

Himilladeenu waxa ay ka tarjumeysaa sababta uu u jiro XHG, cidda aan u adeegno, iyo sida gaarka ah ee aan uga qeyb-qaadanayno himiladaas weyn. Talooyinka iyo warbixinnada XHG waxa ay gacan ka geystaan hufnaanta iyo waxtarka isticmaalka kheyraadka dadweynaha.

Tani waxa ay si dhow noogu xiraysaa dhammaan hay’adaha kale ee dalka si loo gaaro yoolka ugu dambeeya ee lagu hagaajinayo nolosha dadweynaha. Tani waxa ay abuureysaa daahfurnaan iyo isla xisaabtan dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalka lacagaha dadweynaha, kordhinta waxqabadka hay’adaha dowladda, dhisidda wax-ku-oolnimada, kor u qaadista kalsooni-da dadweynaha, iyo isticmaalka hufan ee kheyraadka dadweynaha si loogu faa’iideeyo muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Himilladeena waxaa qeyb ka ah soo saarista warbixinno baaris oo si fudud loo fahmi karo oo muujinaya u hoggaansanaanta sharciga, xeerarka dal-ka iyo dhaqamada hirgalay meeshii ay khuseeyaan iyo sameynta talooyin, marka la fuliyo, saameyn weyn ku yeelanaya horumarinta waxqabadka dowladda.



2.5.3. Qiyamka

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu ku dhisan yahay saldhig qiyam asaasiya leh, kaas oo hagaya hawlihiisa, go’aannadiisa, iyo falgalladiisa.

Qiiyamadaasi waxa ay u adeegayaan si mideysan oo qaabeynaysa aqoonsigeena, kaas oo qeexaya sida aan u gudaneyno waajibaadkeena.

XHG waxa uu taageeraa mihnadda, hal-abuurka, iskaashiga, iyo samaynta isbeddel horseedid, isaga oo u hoggaansamaya heerarka Caalamiga ah ee Hay’addaha Hantidhowrista sare, u-hoggaansanaanta shuruudaha sharcigu jideeyay, ilaalinta heerka ugu sarreeya ee daahfurnaanta, iyo qaada-shada mas’uuliyadda go’aannadeenna.

Qiyamadani waxa ay udub dhexaad u yihiin gaaritaanka ujeedooyinkeena istaraatiijiga ah iyo joogtaynta heerarka ugu sarreeya, uguna wanaagsan xagga hantidhowrista qeybaha dadweynaha.



Hab-dhaqan Mihnadeed

- › Waxa aan u hoggaansannaa Heerarka Caalamiga ah ee Hay'addaha Hantid-howrista sare, si waafaqsan shuruudaha gaarka ah ee xeyn-daabka sharciga dalka.
- › Waxa aan mudnaanta siinaa dhowrista wakhtiga, annaga oo si joogto ah u ilaalina, jawaab ku habboona bixina.
- › Waxa aan ilaalinaa heerarka ugu sarreeya ee daacadnimada, sirta, iyo tayada dhammaan dhinacyada shaqadeenna.
- › Isla-xiisaabtanku waa tiir-dhexaadka hab-dhaqankeenna, oo koobaya shaqadeenna, go'aannadeenna, iyo horumarinta mihnadeenna.
- › Waxa aan shaqaalaheenna ku hogaaminnaa si hufnaan iyo caddaalad ku dheehan tahay.



Hal-abuur

- › Waxa aan si joogto ah u raadinnaa in aan hawlaheenna oo dhan u fulinno sida ugu wanaagsan.
- › Waxa aan si firfircoon u oddorosnaa, uguna jawaabnaa isbeddellada ku xeeran deegaanka.
- › La-qabsiga iyo kartida ayaa udub-dhexaad u ah hawlaheenna, taas oo noo oggolaanaysa in aan si wax-ku-ool ah uga gudubno xaaladaha kala duwan.
- › Rabitaanka joogtada ah ee dib-u-cusboonaysiinta ayaa hagta u heellanaanta hal-abuurkana.
- › Waxa aan diyaar u nahay in aan soo dhaweyno kana mahadcelino dadaal iyo hal-abuur kasta oo wanaagsan.



Iskaashi

- › Waxa aan mudnaanta siinaa furfurnaanta iyo daahfurnaanta oo ah mabaadi'da aasaasiga ah ee hawlaheenna.
- › Waxa aan u shaqaynaa si wadajir ah si aan u gaarno yoolasha la wadaago, annaga oo ka faa'iidayshanayna dadaalka wadajirka ah ee kooxdeenna (our team).
- › Annaga oo dhiirrigelinayna deegaan ku salaysan ixtiraam laba-geesood ah, waxa aan kor u qaadnaa awooddeenna si aan u gaarno natiijooyin miro dhal ah.
- › Waxa aanu dhidibbada u taagnaa oo aanu xoojinnaa xiriirka xirfadeed ee Daneeyeyaasha (Stakeholders) gudaha iyo dibeddaba.



Isbeddel Horseedid

- › Waxa aan mudnaanta siinaa dowladda ka qeyb-qaadashada horumarinta dalkeenna iyo qeybaha kala duwan ee bulshada, annaga oo diiradda saarayna abuuridda isbeddel wanaagsan.
- › Hawlaheenna waxaa haga ballanqaad dhab ah oo ku aaddan raad dhaxal gal u ah jiilasha mustaqbalka.
- › Waxa aan si firfircoon u qaadanaa aragti bulsho oo ballaaran, annaga oo si guud u balanqaadayna mas'uuliyadda bulshada naga saaran, iyo horumarinta joogtada ah ee hindisayaashayada.


2.6. Qaab-dhismeedka XHG

Qaab-dhismeedka XHG waxa uu ku qotama taageerada waajibaadkeeda lagu cad-deeyay Qodobbada 15aad iyo 20aad(9) ee Sharciga Xafiiska Hantidhowrka (Sharci Lr. 14, 10 September, 2023), ee qeexaya heerka awoodda, mas'uuliyadda, iyo isku-xirnaanta si loo xoojiyo hufnaanta, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka gudaha xafiiska, loona hubiyo in hawlaha baarista loo fuliyay si wax-ku-ool ah, oo waafaqsan Sharciyada dalka iyo Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare.

Qaabdhismeedku waxa kale oo uu la socdaa Qorshaha Istaraatiijiga ah ee 2023-2027 waxaana uu taageeraa gaarsiinta waxqabad la qiyaasi karo, iyada oo loo marayo hannaan warbixin oo si cad u qeexan, daadejin maamul, iyo hababka isla xisaabtanka. Qaab dhismeedka hoose waxa uu ka tarjumayaa hiigsiga istiraatiijiyadeed ee XHG si loo gaaro natiijooyin saameyn leh oo si togan gacan uga geysta fulin wax ku oolka ah ee hawlaha ballaaran ee xafiiska:



Qaab-dhismeedka XHG ee JFS | 2025



2.7. Shaqaalaha XHG


Dhammaadka muddada warbixinta ee 2025, tirada shaqaalaha ee si rasmi ah uga hawlgalay Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa ay eheyd 168 shaqaale, marka loo bar-bar dhigo sannadkii 2024 oo tirada shaqaalaha ay eheyd 162 shaqaale, taas oo muujinaysa koror dhan 3.7%. Kororkani waxa uu ka dhashay hirgelinta qorshayn shaqaale oo nidaamsan iyo ansixinta habraacyo lagu salayeeey Qorshaha Istaraatiijiyadda Xafiiska ee 2023-2027, Sharciga Shaqaalaha Rayidka, iyo waajibaadka hay'adda.


Falanqaynta Jaantuska shaqaalaha waxa ay muujineysaa in 168 shaqaalaha guud uu labku ka yahay 62%, halka tirada boqoleyda dhediguna tahay 38%.

Tani waxa ay tilmaamaysaa horumar laga sameeyey kor u qaadidda isu-dheellitirka shaqaalaha hay'adda, iyada oo isla mar ahaantaana muujinaysa baahida loo qabo sii wadidda hirgelinta iyo xoojinta siyaasadda arimaha labka iyo dhedigga (gender mainstreaming).

Shaqaalaha waxa ay ku kala meelaysanyihiin waaxyo kala duwan, taas oo muujinaya in shaqaalaha si habboon loogu qeybiyay unugyada waaxyaha, si loo xaqiijiyo adeeg wax-ku-ool ah, hufnaanta hay'adda, iyo howlgelinta ugu wanaagsan ee kheyraadka aadamaha.

Kororka tirada shaqaalaha iyo qeybinta dheelitiran ee shaqaalaha waxa ay muujinayaan balanqaadka XHG ee xoojinta awoodda hay'adda iyo hagaajinta natijadda mira-dhalka ah ee bixinta adeegga guud.





2.8. Hababka Maamul iyo Korjoogteynta

Si loo dardargeliyo maamul iyo korjoogteyn waxtar leh, XHG waxa uu adeegsadaa dhowr hab oo muhiim ah si kor loogu qaado isla xisaabtanka, daah-furnaanta, iyo u hoggaansanaanta heerarka xirfadeed. Hababkani waxa ay muhiim u yihiin kartida hay'adda si ay u fuliso waajibaadkeeda una ilaaliso kalsoonida dadweynaha.

- ▶ **Hantidhowraha Guud:** oo ah madaxa XHG, waxa uu leeyahay mas'uuliyadda ugu dambaysa ee waxqabadka hay'adda, jiheynta istiraatiijiyadeed, iyo u hoggaansanaanta korjoogteynta waajibaadkeeda sharci. Hantidhowraha Guud waxa uu majaraha u hayaa dowlada isku xirka hawlaha waaxyaha, waxa uuna xaqiijiyaa tayadda iyo wax-ku-oolnimada hawlaha baarista.
- ▶ **Ku-xigeennada Hantidhowraha Guud:** waxa ay ku taageeraan Hantidhowraha Guud maamulka XHG iyo kormeerka hawlihiisa. XHG waxa ay dowlad muhiim ah ka qaataan isku-dubaridka waxqabadyadda waaxyaha kala duwan iyo hubinta tayada iyo wax-ku-oolnimada hawlaha baarista.
- ▶ **Sharciga Hantidhowrka Lr. 14 ee 2023:** Sharcigaan waxa uu bixiyaa qaab-dhismeed sharci oo dhamaystiran oo qeexaya waajibaadka, awoodaha, iyo mas'uuliyadaha XHG. Waxa uu xaqiijiyaa madaxbannaanida hay'adda iyo awooddeeda baarista iyo kormeerka hay'adaha dowladda.
- ▶ **Qorshaha Istaraatiijiga ah 2023-2027:** Qorshaha Istaraatiijiyadu waxa uu u shaqeeyaa, in uu yahay khariidadda guud ee hagta XHG, taas oo qeexaysa yoolalkeeda aragtida fog, ujeedooyinka istaraatiijiga ah, iyo tilmaamayaasha muhiimka ah ee waxqabadka. Waxa uu bixiyaa qaab-dhismeed lagu mideynayo hortabinada kheyraadka, hawlaha iyo waxqabadka istiraatiijiyadeed ee hay'adda.

- › **Qorshe Hawleedka Sannadlaha:** Ujeedooyinka Qorshaha Istiraatiijiyadeed waxa uu u ka tarjumaa kala hortebinta Qorshaha sannadlaha ah ee la cabbiri karo. Waxa uuna u adeegaa sida agab wax-ku-ool ah oo hagaya go'aan-qaada-shada, qoondaynta khayraadka, iyo fulinta si hufan hawlaha baarista, maamulka, iyo dhisidda kartida hay'adda. Qorshe howleedka Sannadlaha ah ayaa si joogto loo daba galaa, dibna loo eegaa, si loo hubiyo in uu la jaanqaado xaaladaha isbeddelaya iyo hortebinta istaraatiijiyadeed.
- › **Hababka Warbixinta iyo Dib-u-eegista Joogtada ah:** XHG waxa uu adeegsadaa habab warbixin iyo dib-u-eegis joogto ah, si uu ula socdo hormarka, u aqoonsado caqabadaha, una xoojiyo isla xisaabtanka. Hababkan waxaa ka mid ah diyaarinta warbixinnada saddex biloodlaha ah kuwa lix-biloodlaha ah, sidoo kale samaynta dib-u-eegista lixbiloodla ah ee qorshe hawleedka sannadlaha ah, iyo warbixinta qiimaynta waxqabadka sannadlaha ah.
- › **Unugga Baarista Gudaha:** Unuggan Waxa uu bixiyaa hubin madax-bannaan oo ku saabsan wax-ku-oolnimada xakamaynta gudaha, maareynta khataraha, iyo hannaanka maamulka ee XHG. Unuggu waxa uu si toos ah warbixinta ugu gudbiyaa hoggaanka sare, iyada oo qiimayn ku samaysa u hoggaansanaanta xeerarka, aqoonsatana khataraha, waxa ayna soo jeedisaa talooyin lagu xoojinayo isla-xisaabtanka iyo hufnaanta shaqo.
- › **Waaxda Maamulka Tayada:** Waaxdu Waxa ay mas'uul ka tahay horumarinta iyo hirgelinta guud ee nidaamka hubinta tayada, kaas oo lagu hubiyo in baarista ay waafaqsan tahay heerarka mihnadeed iyo dhaqannada hirgalka ah ee dhammaan hawlaha baarista. Waaxdu waxa ay sameysaa dib u eegis gudaha ah, waxa ay bixisaa hagitaan, waxa ayna fulisaa falanqaynta sababta keena cilladaha hantidhowr, si loo xaqiijiyo horumarka joogtada ah ee hay'adeed. Waxa ayna dabagal ku sameysaa u hoggaansanaanta sharciga si loo ilaaliyo tayada iyo hufnaanta shaqada XHG.
- › **Xeerka Anshaxa:** XHG waxa uu ballanqaadayaa dhowrista heerarka ugu sareeya ee anshaxa inta lagu guda jiro dhammaan hawlaheeda. Dhammaan shaqaalaha xeerkan waxa uu ku waajibinayaa in ay ilaaliyaan sare u qaadida sharafta, dhexdhexaadnimada iyo mihnadda.
- › **Guddiyada Hagidda iyo Kooxaha Shaqada:** XHG waxa u sameeyey guddiyo hagir iyo kooxo hawleed si ay u kormeeraan mashaariicda gaarka ah iyo hindi-sayaasha, iyaga oo bixiya hagir, jirayn, iyo kormeer si loo hubiyo in si guul leh loo hirgeliyey.

3. UJEEDDOOYINKA ISTARAATIJIYA-DEED IYO HORUMARKA WAXQABADKA

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu ku shaqeeyaa qaab-dhismeedka Qorshaha Istaraatiijiga ah 2023–2027, iyada oo la tixraacayo qorshe hawleedka sannadka 2025 kaas oo u turjumayaa ujeedooyinka istaraatiijiyadeed ee hawlaha iyo ahdaafta sanadlaha ah ee la gaari karo. Qorshe hawleedka sannadlaha ah waxa uu u adeegaa sida aalad wax-ku-ool ah oo hagaya go'aan-qaadashada, qoondaynta kheyraadka, iyo bixinta hantidhowris wax-ku-ool ah, maamul-wanaag, iyo hawlaha dhisidda kartida.

Qorshaha Istaraatiijiga ah waa laf-dhabarta dhammaan hawlaha XHG, waxa uuna hubiyaa in shaqooyinka hay'addu ay si toos ah ula jaanqaadaan waajibaadkeeda, himiladeeda, iyo hiigsigeeda. Fulinteeda waxaa korjoogteeya maamulka sare ee xafiiska, waxaana lagu xoojiyaa ka qeyb-qaadasho loo dhanyahay iyo jawaabcelin ka timaada dhammaan qeybaha kala duwan, si sare loogu qaado lahaanshaha, isla-xisaabtanka, iyo wada-jirka hay'adda.

Dabagalka waxqabadka waxaa fuliyaa iyada oo la adeegsanayo habab habeysan oo warbixineed, oo ay ka midyihiin diyaarinta warbixinnada saddex biloodlaha ah iyo kuwa lix-biloodlaha ah, iyo sidoo kale samaynta dib-u-eegista lixbiloodla ah ee qorshe hawleedka sannadlaha ah, iyo warbixinta qiimaynta waxqabadka sannadlaha ah.

Qorshaha Istaraatiijiyeed ee 2023-2027 waxa uu diiradda saaraa 7 yool oo muhiim ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

YOOL 1: Dhijitaaleynta hannaanka hantidhowrista iyo horumarinta habab hantidhowr oo cusub, si Xafiisku awood ugu yeesho soosaarista warbixinno ku habboon, waqtiyeysan lehna tayo sare

YOOL 2: Hirgelinta maamul wanaagsan, oo leh hoggaan iyo anshax adag, si loo xoojiyo wax-ku-oolnimada iyo waxtarka XHGS.

YOOL 3: Abuuridda xiriir firfircoon iyo iskaashi ku dhisan kalsooni oo lala yeesho daneeyayaasha

YOOL 4: Howlgelinta Kaadir aqoon iyo xirfad sare leh, si loo helo hay'ad loo dhan yahay oo sameysneysa horumar joogto ah.

YOOL 5: Xoojinta dhijitaaleynta iyo adeegyada taageerada si loo xaqiijiyo Waxtarnimada XHGS

YOOL 6: Hubinta Madax-bannaanida, helidda Khayraad ku filan iyo xaqiijinta taageerada hormarka karaanka XHGS

YOOL 7: Adkeynta xiriirka iyo Wadashaqeynta XHG la leeyahay Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDFS

3.1. Soo Koobidda Horumarka Laga Gaaray Yool Kasta Oo Istaraati-jitiyadeed

Intii lagu jiray sannadka 2025, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu si joogta ah u sii waday hirgelinta Qorshihiisa Istaraatiijiyadeed ee 2023–2027, si waafaqsan waajibaadkiisa dastuuriga ah, Sharciga Hantidhowrka Lr. 14 ee 2023, iyo mabaadi'da Ururka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare (INTOSAI). Taas oo lagu xaqiijinaayo in hababka baarista, diyaarinta warbixinta iyo nidaamyadda maareynta tayada ay waafaqsan yihiin heerarka caalamiga ah ee la aqoonsan yahay. Horumarka la gaaray Intii lagu jiray sannadka waxa uu muujinayaa dadaalada socda ee XHG, si loo xoojiyo waxqabadka hay'adda, kor u qaadista tayada baarista, Kordhinta loogu qaado qiyamka iyo faa'iidada ay hay'addu u leedahay muwaadiniinta, Baarlamaanka, iyo daneeyayaasha kale, iyada oo la raacayo INTOSAI-P12 iyo INTOSAI-P20.

Guud ahaan Horumarka laga gaaray yoolalka istaraatiijiyadeed waxa ay tilmaamayaan dadaallo joogto ah oo lagu xoojinayo habboonaanta hawlaha la xiriira baarista, maamulka gudaha, la hawlgalka daneeyayaasha, iyo horumarinta karaanka. Xafiisku waxa uu si joogta ah u adeegsadaa qorshaha baarista ku saleysan khataraha iyo ahmiyadda mabaadi'da, (materiality principles) taas oo gacan ka geysatay hagaajinta ku habboonaanta, waqtiyaynta iyo tayada natiijooyinka warbixinadda baarista. Qorshahan baarista ku saleysan khatarta waxaa buddhig looga dhigay qeybaha kal duwan ee qiimeyta khataraha falanqaynta miisaaniyadda, iyo khaladaadkii baarista hore, si loo kordhiyo baaxada baarista iyada oo la adeegsanayo kheyraadka la heli karo.

Qeybaha baaristu waxa ay koobayaan maaliyadda, u hoggaansanaanta sharciga, waxqabadka, nidaamyada macluumaadka, baarista gaarka ah, iyo baarista fatashka oo baaxad ahaan la xoojiyey, taas oo u suurtagelisay XHG in uu sameeyo hubinno dhexdhexaad ah, oo madax-bannaan kuna saleysan sida loo isticmaalay khayraadka guud iyo waxqabadka barnaamijyada dowladda. Dadaaladan waxa ay taabo geliyaan la jaanqaadidda ISSAIs ee tayeynta baarista, waxa ayna gacan ka geystaan kor u qaadidda daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka hay'adaha dowladda, si joogto ahna ula xiriirta baaxada, habraacyada, iyo warbixinnada baarista.

Hagaajinta maamulka iyo maareynta hay'adda ayaa dib loo xoojiyay sarana loo qaaday, iyada oo loo marayo korjoogteynta waxqabadka, hababka xakamaynta gudaha, iyo heerarka anshaxa. Tallaabooyinkan ayaa sare u qaaday sumcadda hay'adda iyo wax-ku-oolnimadda Shaqada.

La hawlgalka daneeyayaashu ayaa qeyb muhiim ah ka ahaa hawlaha XHG ee sannadka 2025. Wadashaqaynta joogtada ah ee lala yeeshay Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dowladda (MDAs), Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah dowladda Federaalka, bah-wadaagta horumarinta, ururrada bulshada rayidka, iyo warbaahinta ayaa gacan ka geystay sare u qaadista fahamka wanaagsan ee ku saabsan natiijooyinka baarista, isla markaana taageeray dabagalka talooyinka baarista. La

hawlgaladani waxa ay kor u qaadeen daah-furnaanta, waxa ayna dib u xoojiyeen kalsoonida dadweynaha ee dowlada korjoogtaynta xafiiska.

XHG waxa uu muhiimada siiyay hortabinta horumarinta aqoonta shaqaalaha iyo joogtaynta hannaanka hay'adeed. Dhisidda mihnada shaqaalaha, tababarrada, iyo horumarinta hoggaanka ayaa xoojisay karaanka hay'adda, isla markaana caawisay gudashada waajibaadka ballaaran ee XHG.

Dhinaca kale, XHG waxa uu horumar ka sameeyey in uu ka gudbay habkii hore warqadaha ee korjoogteynta qandaraasyadda, una wareegay Nidaamka Maareynta Qandaraasyada oo dijitaal ah, ammaan ah, isla markaana ku salaysan xog (data-driven), taas oo kor u qaadaysa daah-furnaanta, hufnaanta, iyo isla xisaabtanka dhammaan hay'adaha dowlada. Adeegyada taageerada (support services) ayaa si-doo kale sii horumaray, taas oo gacan ka geysatay hagaajinta hufnaanta hawlgelinta iyo xoojinta kheyraadka hay'adeed.

Inkasta oo ay jiraan xaddidaado joogta ah oo kheyraadka la xiriira, xafiisku waxa uu si buuxda ugu shaqeeyey madaxbannaanidiisa, waxa uuna sii waday taageerada horumarinta karaanka, iyada oo la raacayo qaab-dhismeedka sharciga dalka iyo heerarka caalamiga ah. Iskaashiga joogtada ah ee lala yeeshay Xafiisyada Hantid-howrka Guud ee Dowlad-goboleedyada ayaa dhiirrigeliyay mideynta habraacyada baarista iyo dib u xoojinta isla xisaabtanka dhammaan heerarka dowladda.

Guud ahaan, horumarka la gaaray sannadka 2025 waxa uu muujinayaa horumar joogto ah oo ku wajahan yoolalka Qorshaha Istaraatiijiyeed ee 2023-2027. Qeybaha xiga waxa ay bixinayaan falanqayn faahfaahsan oo ku saabsan guulaha, caqabadaha, iyo tallaabooyinka la qorsheeyay ee hoos yimaada yool kasta oo istaraatiijiyadeed.


3.2. Waxqabadka Laga Gaaray Bartilmaameedyada

Dulmarka guud ee ku saabsan horumarka laga gaaray hawlaha la fuliyay ee hoos yimaada yool kasta istaraatiijiyeed inta lagu gudajiray mudadan. Yool kasta waxa uu ka kooban yahay hawlo sanadle ah kuwaas oo loo qiimeeyo si waafaqsan qorshe hawleedka.

Waxqabadkani waxa uu ka tarjumayaa horumarka hadda jira iyo falanqaynta dhammaadka sannadkii hore ee 2025, iyada oo bixinaysa aragtiyo wax-ku-ool ah oo loogu talagalay horumar joogto ah, waafaqsana Qorshaha Istaraatiijiyeed ee 2023-2027.



HORUMARKA WAXQABADKA SANNADLAHA - 2025



The following sections provide detailed performance summaries for each strategic goal.

› **Shaxda : Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 1aad**

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Khatarta iyo iyo ahmiyadda ku saleysan guud ahaan qorshaha baarista iyo dabagalka.	100% Howlaha baarista waa la qorsheeyay, la fuliyay, lana dabagalay iyad oo la adeeg-sanayo Qorshaha sanadlaha ah ee ku salaysan qiimeynta khataraha iyo ahmiyada.	- Waxaa la qabtay aqoon-isweydaarsi wadareed ah si loo soo gunaanado qorshaha guud ee baarista sannadka 2025. - Sanadka 2025, Hantidhowraha Guud waxa uu ansixiyay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka, waxaana lala wadaagay dhammaan maamulka sare. - Kormeer joogto ah iyo tallaabooyin daba-gal ah ayaa la sameeyay si loo xaqiijiyo hirgelinta qorshaha baarista 2025. - XHG waxa uu sameeyay dabagal lagu sameeyay natiijooyinkii iyo talo-soo-jeedintii sannadihii hore, si loo xaqiijiyo in la fuliyay iyo in kale. - XHG ayaa diyaariyay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka 2026.	La Fuliyey	
Soo saarista warbixinta baarista maaliyadeed oo tayo sare leh oo waqtiyeysan.	- In lagu sameeyey Hay'adaha federlka soomaaliya baaritaanno maaliyadeed oo sanadle ah, tayo sare leh, oo waqtiyeysan. - In la kordhiyo dowlada XHG ee fulinta baarista mashaariicda ay maal geliyaan deeqbixiyaasha, waxaana laga sameeyey baaritaanno tayo sare leh oo wakhtiyeysan	- Waxaa la ansixiyey Hagaha Baarista Maaliyadeed iyo Siyaasaddaha hawladaadajinta iyo ahmiyadda - Hantidhowrayaasha maaliyadeed ayaa la tababaray si ay u fuliyaan Baarista xisaab-xirka maaliyadeed ee sanadka 2024). - Waxaa la sameeyay Baarista Maaliyadda iyo Mashaariicda si-dii loo qorsheeyay, waxaana warbixinta sanad maaliyadeedka 2024 loo gudbiyay Baarlamaanka, iyada oo nuqullo loo diray Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha, dhammaadka Juun; 30 maalmood kadib markii la gudbiyay, warbixinta ayaa la daabacay iyada oo la raacayo Sharciga Hantidhowrka (Lr. 14, 2023) & Sharciga PFM (Lr. 17, 2019). - Waxaa qaar ka mid ah shaqaalaha baarista loo xulay tababarka Shahaadada PESA-P ee baarista maaliyadeed. - Waxaa la hawl geliyay shirkad gaar ah oo baaris ku sameysay shirkadda Gargaara Company Limited.	La Fuliyey	


UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Hawsha baarista u-hoggaansanaanta sharciga oo awood u leh in waqti go'an lagu fuliyo baaris tayo sare leh oo taabanaysa arrimo badan oo muhiim u ah.	In la fuliyo Baarista sanadlaha ah ee u-hoggaansanaanta sharciga oo tayo sare leh, taas oo ku saabsan caqabadaha kala duwan ee khuseeya u-hoggaansanaanta sharciga ee Hay'adaha Dowladda	- Hagaha u hoggaansanaanta sharciga oo la ansixiyay lana wadaagay Hantidhowrayaasha u-hogaansanaanta Sharciga ee XHG - Waxaa baarista u hoggaansanaanta sharciga lagu sameeyay 21 ka mid ah 24 hay'adood oo la qorsheeyay, si waafaqsan Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka. - Tababar gudaha ayaa loo qabtay Shaqaalaha cusub oo ku saabsan ku shaqeynta warqadaha shaqada ee Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga. - Dib-u-eegis ayaa lagu sameeyay warqadaha shaqada ee ay diyaariyeen shaqaalaha baarista, waxaana la bixiyay jawaabcelin lagu ogaaday laguna hagaajinayo khaladaadka guud ee jira. - Warqadaha shaqada ee U-hoggaansanaanta Sharciga ayaa la geliyay nidaamka S-SEAT si loogu sameeyo tayo hubin gudaha ah intii lagu guda jiray shaqada baarista, waxaana la bixiyay jawaabcelin lagu ogaaday khaladaadka guud ee jira.	Waa La Fuliyey	
		- Waxaa qaar ka mid ah shaqaalaha baarista loo xulay tababarka Shahaadada PESA-P ee baarista U-hoggaansanaanta Sharciga. - Waxaa la qabtay tababar ku saabsan dib u eegista xakameynta tayada.		
		- Waxa aan qabsoomin tababbarka qiimeynta khataraha ee baarista u-hoggaansanaanta sharciga ee ku saabsan Hagaha baarista u-hoggaansanaanta sharciga. - Waxa aan qabsoomin tababar khuseeya hagidda shaqada Baarista U-hoggaansanaanta sharciga oo ay bixinlaheyd Hay'ad Hantidhowr Sare oo khibrad leh (SAI). - Raad-raaca xaaladda iyo isticmaalka hantida ayaan la dhameystirin, si loo xaqiijiyo in si sax ah loo maamulay loogana hortago lunsiga.		- Labadan hawllood ee qiimaynta khatarta iyo hagitaanka shaqada ee ku saabsan tababarka baarista u hoggaansanaanta ayaa dib loo dhigay sababo la xiriira xad-didaad dhaqaale. Waxaa mudnaanta la siinayaa, lana hirgelinayaa 2026, iyada oo la raacayo baahiyaha la aqoonsaday ee XHG. - Hawsha raad-raaca xaaladda iyo isticmaalka hantida waxaa loo wareejiyay Yoolka 5aad, waxa uuna qeyb ka yahay horumarinta ama soo iibsiga Barnaamijka Diiwaangelinta Hantida si loogu daro nidaamka OAMIS.

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Hirgelinta baaris xooggan ee Nidaamyada Macluumaadka (IS audit) oo awood u leh in ay soo saarto warbixinno tayo sare leh oo ku saabsan nidaamyada IT-ga ee dowladda	Baaris Gaarka ah oo tayo sare leh oo lagu sameeyo qeybo cayiman oo danta guud ah, oo ay ka mid tahay baaritaannada Macluumaadka Nidaamyada iyo Caqbadaha Deegaanka.	- Waxaa qabyo qoraal ah Hagaha Baarista macluumaadka Nidaamyada (IS audit) si loo mideeyo hubinta macluumaadka nidaamyada dowladda. - waxaa la fuliyay lagana warbixiyay baaritaanada macluumaadka nidaamyada afar hay'adood oo xukuumadda Federaalka Soomaaliya ah, sida ku cad qorshaha baarista. - Waxaa heshiis is-afgarad ah lala saxiixay Turkish Court of Accounts (TCA) kaas oo ku saabsan iskaashi hantidhowris. - Tababar gudaha ah ayaa loo qabtay kooxda baarista macluumaadka Nidaamyada (IS audit). - Shahaado-siinta iyo Horumarinta Mihnadda qaar kamid ah Hantidhowrayaasha Baarista Macluumaadka Nidaamyada (IS audit) ayaan la dhammeystirin sababo dhaqaale awgood.		- Dhammeystirka qabyo qoraalka Hagaha Baarista macluumaadka Nidaamyada (IS audit) ayaa loo xilsaaray Shirkad Mihnad u leh, Sanadka 2026, si ay u dhammeystirto kadibna la saxiixo. - Barnaamijka shahaada siinta mihnadeed ee baarayaasha nidaamka macluumaadka ayaa la dib loo dhigay 2026 - As a result of financial constraints, the professional certification for IS auditors will be postponed until the following year of 2026.
Hirgelinta baaris gaarka ah ee Fatashka (Forensic Audit).	In Baaritaanno Fatash ah oo tayo sare leh lagu sameeyo arrimaha muhiimka ah ee la xiriira khiyaanada, lunsiga iyo ku takri-falka hantida dowladda.	- waxaa la fuliyay Baaris Fatash ah oo ku timid baahi jirta. - Waxaa Qabyo qoraal ah Hagaha Baarista Fatashka. - Tababar ku saabsan hagaha Baarista Fatashka oo loogu talagalay hantidhowrayaasha baarista fatashka ayaan qabsoomin. - Tababar sanadle ah oo ku saabsan habraacyada baarista fatashka ayaan qabsoomin - Dhismaha sheybaarka fatashka qalabeysan ee dhijitaal-ka ah ayaan la qabsoomin. - Barnaamijka Horumarinta Mihnadda Shahaada-siinta ee hantidhowraha Fatasha khiyaanada (CFE) ayaa loo xulay qayb kamid ah shaqaalaha baarista fatashka. - Waxaa qabsoomay kulan fogaan arag ah oo u dheexeeyey Guddiga Hagidda (Steering Committee) ee Xafiiska Hantidhowrka Guud iyo Xafiiska Hantidhowrka Qaranka ee Sweden (SNAO) si dib u eegis loogu sameeyo horumarka iyo in la bixiyo hagista baarista waxqabadka.		- Dhammeystirka qabyo qoraal ah Hagaha Baarista fatashka ayaa loo xilsaari doonaa Shirkad Mihnad u leh Sanadka 2026. - Aqoon isweydaarsi khuseeya Baarista fatashka oo ay bixin lahayd Hay'ad Hantidhowr Sare oo khibrad leh (SAIs) lama fulin sanadkan, balse waxaa la filayaa in ay qabsoonto sanadka soo socda. - Caqabado dhaqaale awgood, waxaa sanadka 2026 loo dib dhigay dhismaha sheybaarka danabeysan iyo qabashada tababarka sanadlaha ah ee Baarista Fatashka.

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
		- si loo taageero Waaxda Waxqabadka, Waxaa la qabtay aqoon-isweydaarsi toos ah oo khuseeyey hanaanka kormeerka, iyo hubinta tayada ee baarista waxqabadka, ururinta xogta, muunadda, naqshadaynta, natiijooyinka, gunaanadka, iyo tallooyinka. - Waxaa qaar ka mid ah Hantidhowrayaasha Waxqabadka loo qabtay tababar gudaha ah oo ku saabsan baarista bay'adda.		
Xakamaynta tayada hantidhowrka oo xooggan, Jiheynta Habka Maareynta iyo dib u eegista hannaanka baarista.	In la xaqiijiyo warbixinnada baarista oo tayo sare leh, nidaamka adag ee xakameynta tayada ayaa loo baahanyahay in laga suurageliyo XHG.	- Nidaamka S-SEAT waxaa loo adeegsadaa in hab nidaamsan loo isticmaalo warqadaha shaqada (Working Papers) si loo xakameeyo tayada dhammaan hawlaha baarista. Si kastaba ha ahaatee, waxaa loo adeegsaday labada baaritaan ee U-hoggaansanaanta Sharciga iyo Maaliyadda. - Waxaa si dhammeystiran loo adeegsaday Liiska Hubinta Xakameynta Tayada ee Baarista Waxqabadka, Maaliyadda, Macluumaadka Nidaamyaada, U-hoggaansanaanta Sharciga		
Hubin-Tayo oo madax-bannaan ayaa sanad walba lagu sameeyaa qaar ka mid ah baaritaannada, taas oo gacan ka geysaneysa waxbarsho iyo horumar saameyn leh.	Si loo hubiyo in warbixinnada XHG ay yihiin kuwo habboon marka la tixraaco in nidaamyada xakamaynta tayada si habboon loo qaabeeyey, si wax ku ool ah loo hirgeliyey, si joogto ahna loogu dabbaqay si waafaqsan heerarka mihnadeed iyo shuruudaha sharci iyo kuwa xeerarka.	- Hagaha hubinta tayada oo waafaqsan heerarka caalamiga ah ayaan la dhammeystirin. - Waxaan la fulin Shaqo ku tababarashada habka hubinta tayada, oo ay ku jirto hubinta dambe ee qaar ka mid ah baaritaannada maaliyadeed iyo kuwa u-hoggaansanaanta sharciga si loo qiimeeyo waafaqsanaanta sharciyada, Hagayaa-hasha baarista, iyo heerarka caalamiga ah. - Dib-u-eegista tababar ku saabsan shaqada oo diiradda lagu saarayay hal qeyb oo ah dib-u-ee-gista hay'adda, oo ay ka mid tahay warbixin ku saabsan hoos u dhaca hay'adda iyo tallooyinka ku jira ayaan la fulin.		- Dhammeystirka Qabyo-qoraalka Hagaha hubinta tayada oo waafaqsan heerarka caalamiga ah ayaa loo xilsaaray Shirkad Mihnad u leh, Sanadka 2026. - Shaqo ku tababarashada habka hubinta tayada, oo ay ku jirto hubinta dambe ee qaar ka mid ah baaritaannada maaliyadeed iyo kuwa u-hoggaansanaanta sharciga ayaa la filayaa in ay qabsoonto 2026



Hantidhowraha Guud ayaa saxiixay Qorshe-sanadeedka Guud ee Baarista ee XHG, Janaayo 26, 2025.



Hantidhowraha Guud iyo Ku-xigeenkiisa ayaa Febraayo 16, 2025 kulan fogaan-arag ah la yeeshay Agaasimayaasha Wasaaradaha kala ah Gaadiidka & Duulista Hawada, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, iyo Madaxa Shirkadda Fawari, si dib u eegis loogu sameeyo hirgelinta tallooyinkii Warbixinta Baarista Gaarka ah ee 2023.



Shaqaalaha XHG ayaa ka qaybgalay tababar heer sare ah oo ku saabsan hab-raacyada baarista waxqabadka, uruurinta caddaymaha, iyo qorista warbixinnada, kaas oo lagu qabtay Nairobi, Kenya, Abriil 29, 2025.



Tababar Gudaha ah oo ku saabsan baarista Maaliyadeed oo lagu qabtay Muqdisho, Soomaaliya, Abriil 30, 2025.



XHG ayaa mas'uuliyiin sare oo ka tirsan dowladda siiyay warbixin kooban oo ku saabsan natiijooyinka muhiimka ah ee baarista sannad-maaliyadeedka dhammaaday Diseembar 31, 2024, Muqdisho, Soomaaliya, Luulyo 6, 2025.



XHG ayaa ka qeybgalay aqoon-is-weydaarsi uu martigaliyay XHG ee Zambia, ayna isugu yimaadeen 24 dal oo Afrika ah kaas oo uu soo diyaariyay URURKA AFROSAT-E



Saraakiil sare oo ka tirsan XHG ayaa ka qaybgalay shir heer sare ah oo Midowga Afrika ku qabtay Lomé, Togo, kaas oo ku saabsanaa maareynta deymaha iyo isla xisaabtanka, May 18, 2025.



XHG ayaa la kulmay Wasiirka Dekedaha iyo Gaadiidka Badda, iyo mas'uuliyiin ka socday Albayrak-Somalia Muqdisho si ay uga wada hadlaan hirgelinta talooyinka baarista gaarka ah, iyo sidoo kale xoojinta hufnaanta iyo isla xisaabtanka, Agoosto 2, 2025.





Wadatashi Mihnadeed oo ku saabsan Baaritaannada Kaabayaasha Magaalooyin-ka ayaa lagu qabtay Muqdisho, Soomaaliya, Oktoobar 23, 2025



XHG ayaa ka qeybgalay bandhigga natiijada baaris wadareedka waxqabadka ee AFROSAI-E, Pretoria, South Africa, Nofeembar 3, 2025.




Aqoon-is-weydaarsi wadajir ah oo dib-u-eegis dhameystiran lagu sameynayo Qor-she-sanadeedka Guud ee Baarista 2026, Muqdisho, Soomaaliya, Diseembar 3, 2025.

› Shaxda 2 : Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 2aad

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
waxqabad guud oo xooggan, iyo maareynta isbeddellada.	› In la xaqiijiyo waxqabadka XHG oo xooggan iyo maaraynta isbeddelka si wax-ku-ool ah, iyada oo loo marayo qorshayn tayo leh dabagal joogto ah, adeegsiga kheyraadka, iyo warbixinno daahfuran oo waafaqsan hortabinnada istiraatiijiyadeed iyo qaababka cusub ee baarista.	› Waxaa la sameeyay Jadwalka XHG ee munaasabadaha iyo shirarka si loo fududeeyo isku-dubaridka iyo hufnaanta. › Waxaa la dhammaystiray, lana faafiyay warbixinta waxqabadka sanadlaha ah ee XHG 2024. › Waxaa la soo saaray warbixinnada horumarka saddex-biloodlaha iyo lix-biloodlaha ah. › Waxaa la dhammeystiray dib-u-eegis Qorshe Hawleedka Sanadlaha ah ee XHG 2025. › Waxaa la diyaariyay, lana ansixiyay qorshe howleedka sannadlaha ah ee XHG 2026. › Waxaa dib-u-eegis lagu sameeyay qorshaha istiraatiijiyadeed ee muddada-dhexe, waxaana qabyo-qoraal ah hannaanka dabagalka iyo qiimeynta ee ku saleysan AFROSAI-E. › Waxaa la qabsoomay aqoon-is-weydaarsi ku saabsan maaraynta istiraatiijiyadeed, hawlgalka, iyo isbeddelka iyo qiimeynta hannaanka dhismaha karaanka hay'adda (ICBF). › Hawlaha baarista gudaha oo ay ka mid yihiin aqoon-isweydaarsiga hagidda shaqada, baarista saddex waaxood oo ka mid ah XHG, soosaarista warbixinta ku socota HG iyo horumarinta axdiga baarista gudaha ayaa la qabtay. › Shahaado-siinta iyo Horumarinta Mihnadda qaar kamid ah Hantidhowrayaasha Baarista Gudaha ayaan la dhammeystirin sababo dhaqaale awgood.		› Dhammeystirka qabyo qoraal ah qaab-dhismeedka dabagalka iyo qiimeynta, hagaha baarista gudaha (internal audit Charter), ayaa loo xilsaari doonaa Shirkad Mihnad u leh Sanadka 2026. › mihnadda hantidhowraha gudaha ayaa la filaa in la fuliyo 2026

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Diyaarinta hannaan ballaaran oo khuseeya maaraynta tayada iyo xakamenyntagudaha ee XHG.	in la diyaariyo, lana hirgeliyo hannaan balaaran oo khuseeya maaraynta tayada iyo xakamaynta gudaha ee XHG, taas oo xaqiijineysa tayo joogtada ah, u hoggaansanaanta sharciga, iyo xakameynta gudaha oo wax-ku-ool ah ee dhammaan hawlaha baarista iyo kuwa aan baarista khuseynba.	- Waxaa dib loo dhigay horumarinta tayada ballaaran ee maareynta hay'adda iyo hannaanka xakamaynta gudaha oo ay ka mid yihiin filashooyinka xakamaynta deegaanka, mabaadi'da, mas'uuliyadaha iyo baahiyaha tayada iyo xakamaynta gudaha. - Waxaa ladiyaariyay qabyo-qoraalka siyaasadda maareynta tayada oo waafaqsan heerarka caalamiga ah ee ISSA 140. - Waxaa ladiyaariyay qabyo-qoraalka siyaasadda Maareynta Khatarta ee XHG. - Waxaa la qabtay aqoon-isweydaarsi ku saabsan maareynta tayada si kor loogu qaado fahamka shaqaalaha XHG ee tayaynta barista iyo warbixinta. - Waxa aan qabsoomin caqabado dhaqaale awgood, Aqoon-is-weydaarsiyo ku saabsan aqoonsiga khatarta, yaraynta, iyo dukumentiyada loogu talagalay wakiillada u waaxyaha.		- Dhammeytirka qabyo-qoraalka siyaasadda hannaanka xakameynta gudaha, tayada maamulka iyo maareynta khatarta ayaa loo xilsaari doonaa Shirkad Mihnad u leh Sanadka 2026. - Aqoon-isweydaarsiyada la qorsheeyey ee ku saabsanaa aqoonsiga khatarta, yareynta, iyo dukumentiyada loogu talagalay wakiillada waaxyaha ee ah diiwaangeliyaasha khatarta ayaa la qabandoonaa sanadka 2026.
Adkeynta hufnaanta gudaha	in la adkeeyo hufnaanta gudaha iyada oo sare uqaadida ku dhaqanka anshaxa, ka hortagga saamaynta aan habboonayn, iyo hubinta in dhammaan shaqaaluhu u hoggaansamaan Xeerka Anshaxa inta lagu guda jiro hawlkaasta oo baariseed iyo mid aan baaris aheynba.	waxaa la cusbooneysiisay, dib-u-eegisna lagu sameeyey u-hoggaansanaanta xeerka anshaxa ee XHG, waxaana la qabtay kulamo wacyigelin ah oo ku saabsan xeerka anshaxa.		



XHG waxa uu u gudbiyay Warbixinta Waxqabadka Sannadlaha ah Baar-lamaanka, Madaxweynaha, iyo Ra'iisul Wasaaraha May 20, 2025.



Aqoon-is-weydaarsi ku saabsan Maareynta Istaraatiijiyadeed: oo koobayey agabayda dabagalka ee Qorshaha Hawlgalka, Warbixinta Waxqabadka Sannadlaha ah, iyo dabagalka talooyinka baarista, ayaa la qabtay Oktoobar 16, 2025



Aqoon-is-weydaarsi Gudaha ah oo ku saabsan dabagalka iyo Qiimeynta (M&E) oo loo qabtay Unugga M&E iyo Agaasimayaasha Waaxyaha, Nofeembar 20, 2025.



Wacyigelinta ku saabsan ISSAI140, Muqdisho, Soomaaliya, Diseembar 4, 2025.



Taageerada Hantidhawrista Gudaha ee XHG, Muqdisho, Soomaaliya, 18 Diseembar 2025.

› Shaxda 3 : Ujeedooyinka geedi-socodka yoolka 3aad

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Taageerada karaanka Barlamaanka si ay u turxaanbiyaan warbixinnada baarista.	› kulamo joogta ah iyo wadashaqeyn waqtiyeysan oo lala yeesho barlamaanka oo ku saabsan turxaanbixinta baarista iyo dabagalka.	› intii lagu guda jiray waqtiga warbixintan, XHG ma uusan bixin taageero farsamo iyo hagiis oo la siiyo baarlamaanka si loo turxaanbixiyo warbixinnada baarista. › Waxaa caqabado dhaqaale awgood dib loo dhigay Tababarro wacyigelin ah oo la siinlahaa barlamaanka (gaar ahaan Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda) oo ku saabsanaa dowladda XHG iyo shaqada baarista, gaar ahaan noocyada cusub ee baarista sida Waxqabadka iyo Fatashka.		› Labada hawloodba waxa ay marayaan marxalad horumarineed, agabka loo baahnaa ee aqoon-is-weydaarsiga waa la diyaariyey, laakiin caqabad dhaqaale awgeed tababarkii dib ayaa loo dhigay.
Xoojinta iyo Taageeridda xiriirka daneeyayaasha	› kulamo joogta ah iyo wadashaqeyn waqtiyeysan oo lala yeesho Hay'adaha Fulinta oo ku saabsan natiijooyinka baarista, talooyinka arrimaha soo kordha.	› iyada oo la raacayo soo saarista warbixinnada baarista, XHG waxa uu siidaayay uuna faafiay war-saxaafadeed. › Si loo xoojiyo la hawlgalka daneeyayaasha, XHG waxa uu si guul ah u hirgeliyay hawlaha sanadlaha ah oo ay ka mid yihiin tababarro sanadle ah oo loo qabto hay'adaha dowladda, waxaana la wadaagay aragtiyada iyo fahanka ku saabsan natiijooyinka baarista, sidoo kale, XHG waxaa wacyigelin la siiya wakiilada warbaahinta oo ku saabsan dowladda XHG iyo sida ay u turjumayaan warbixinnada baarista iyo natiijooyinka. › XHG waxa uu soo saaray muuqaallo wax-ku-ool ah oo muujinaya guulaha XHG. › XHG waxa uu diyaariyay qabyo-qoraalka istiraatiijiyadda xiriirka. › XHG waxa uu soo saaray joornaallo, kuwaas oo uu kusoo bandhigo guulaha iyo aragtiyada muhiimka ah. › XHG waxa uu ka qaybgalay in ka badan toban xafad xilwareejin ee dawladda. › Waxaa la soo saaray loona gudbiyay HG warbixin sanadle ah oo ku saabsan xaaladda hantida dadweynaha.		› Dhameystiraka qabyo-qoraalka Istiraatiijiyadda Xiriirka ayaa loo xilsaaray Shirkad Mihnad u leh, Sanadka 2026.

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
joogteynta sare u qaadidda habka warbixinnada XHG lyo la wadaagista ilaha warbaahinta.	In si guud dadweynaha loola wadaago natiijooyinka baarista XHG, taas oo sare u qaadeysa aragtida XHG ee deeqbixiyeayaasha, iyada oo loo marayo kulamo wadashaqeyn oo joogta ah oo lala yeesho muwaadiniinta si sare loogu qaado aragtida lyo in la xusho baaritaanada lyo xakameynta ku habboon.	- Waxaa Mareegta XHG lyo Baraha Bulshada lagu daabay warbixinta baarista oo kooban oo loogu talagalay muwaadiniinta. - Waxaa la naqshadeeyay, sarena loo qaaday heerarka warbixinnada baarista si dhammaan daneeyeyaasha ay ugu suurtagasho in ay si fudud u fahmaan una isticmaalaan natiijooyinka baarista. - Waxaa la horumariyay qabyo-qoraalka tilmaamaha qorista warbixinta. - intii lagu guda jiray waqtiga warbixinta, XHG waxa uu si joogta ah u gelinayay mareegtiisa iyo baraha bulshada xogta warbixinnada. - waxaa si joogta ah loo horumariyay mareegta iyo ilaha baraha bulshada.		Dhammeystirka qabyo qoraal tilmaamaha Qorista warbixinnadda ayaa loo xilsaaray Shirkad Mihnad u leh Sanadka 2026.
Gacan ka geysashada sare u qaadista mihnadda xisaabaadka lyo baarista gudaha Soomaaliya		intii lagu gudajiray waqtiga warbixinta, XHG waxa uu sameeyay dadaallo dheeraad ah oo uu ugu qareemayo dhismaha Hay'ad xisaabaadka Soomaaliya.		
wax ku biirinta lyo wax ka barashada bulshada caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare lyo kor-joogteynta		XHG waxa uu si wax-ku-ool ah uga qeybqaatay dodo, aqoon-isweydaarsiyo iyo shirar heer gobol iyo mid caalami ah, kuwaas oo si cad u khuseeya shaqada XHG.		



Hantidhawraha Guud wafdi uu hogaaminayo ayaa ka qaybgalay Madasha Caalamiga ah ee Maalgashiga UNCTAD ee Horumarka iyo Kobaca Loo Siman Yahay oo ka dhacday Geneva, Switzerland, Maarso 18, 2025.



Hantidhawraha Guud ayaa si rasmi ah uga qaybgalay Kalfadhigii 47aad ee Golaha Wasiirrada Bulshada Bariga Afrika (EAC), kaas oo la qabtay Abriil 25, 2025 magaalada Arusha, Tanzania




Hantidhawraha Guud ayaa ka qaybgalay Kulankii 21aad ee Guddiga Maamulka AFROSAI-E, oo lagu qabtay Seychelles 24 May 2025.




Hantidhawraha Guud ayaa qaabilay wafdi uu hoggaaminayo Agaa-simaha cusub ee Mashruuca EU SFA, Mudane Menno Jan van der Ven, May 7, 2025.



Xafiiska Hantidhawrka Guud ayaa la saxiixday Heshiis Is-afgarad (MoU) Hay'adda Is-la-xisaabtanka Qaranka (TCA), Ankara, Turkey, 2025.



Aqoon-is-weydaarsi wacyigelin warbaahineed oo lagu qabtay Muqdisho, Soomaaliya, Agoosto 13, 2025.



XHG ayaa martigeliyay hay'adda WFP iyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda, magaalada Muqdisho 27 Agoosto 2025.

Xafiiska Hantidhawrka Guud ayaa Muqdisho ku qabtay Aqoon-is-weydaarsi Wacyigelin Qaran oo ku saabsan Shuruucda Hantidhawrka iyo Maareynta Maaliyadda Guud, Sebtembar 22, 2025.



Aqoon-is-weydaarsi Heer Gobol ah oo ku saabsan la hawgalka Daneeyayaasha, Pretoria, Koonfur Afrika, Oktoobar 25, 2025.



Hantidhowraha Guud ayaa ka qaybgalay Madasha 3aad ee Kor u Qaadidda Daahfurnaanta iyo La-dagaallanka Musuqmaasuqa, oo lagu qabtay Qaahira, Masar, Oktoobar 26, 2025.



XHG ayaa la kulmay mas'uuliyiin ka socday UNODC iyo UNDP si loo xoojiyo wada-shaqeynta ku saabsan maareynta khataraha musuqmaasuqa iyo kor u qaadidda daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda. Kulanka ayaa ka dhacay Muqdisho, Soomaaliya, Nofeembar 12, 2025.



Hantidhowraha Guud ayaa saxiixay Heshiis Is-afgarad (MoU) uu la galay Hay'adda Isla-xisaabtanka Qaranka (Accountability State Authority), Sharm El-Sheikh, Masar, Nofeembar 22, 2025



Hantidhowraha guud ayaa ka qaybgalay Shirweynihii 15aad ee Golaha Guud ee ARABO-SAI, oo lagu qabtay Jeddah 7 Diseembar 2025.

› Shaxda 4 : Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 4aad

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Hay'ad leh awood buuxda oo u suurtagelinaysa gudashada waa-jibaadkeeda.	› Kobcinta Hay'adda	› Waxa la diyaariyay qabyo qoraalka qaab-dhismeedka noocyada shaqo ee dhammaan dowlarka si loo xoojiyo dal-laacadaha iyo haynta shaqaalaha. › qaab-dhismeedka hay'adda oo dib-u-eegis lagu sameeyay ayaa la diyaariyay lana dhaqangeliyay, kaas oo kala saaraya waaajibaadka iyo mas'uuliyadaha. › Waxa la diyaariyay, lana dhamaystiray shaqo qeexitaanada shaqaalaha XHG. › Waxaa la diyaariyay qabyo-qoraalka istiraatiijiyadda ka qeybgelinta haweenka.	Qeyb ahaan waa la fuliyay	› Dhammeystirka qabyo qoraal-ladda qaab-dhismeedka noocyada shaqo iyo istiraatiijiyadda ka qeybgelinta haweenka ayaa loo xilsaaray Shirkad Mihnad u leh, Sanad-ka 2026.
Maamul adag oo maareyn kara guud ahaan shaqaalaha XHG.		› waxa aan la fulin mideynta hannaanka, foomamka iyo tilmaamaha si waafaqo sharciga xafiiska iyo sharciga shaqaalaha rayidka. › Waxaa la diyaariyay, lana dhaqangaliyay qorshaha tababarka sanadlaha ee shaqaalaha › Waxaa la diyaariyay qabyo-qoraalka istiraatiijiyadda shaqaalaha. › Waxaa la diyaariyay qabyo-qoraalka qorshaha xil-wareejinta.	la ma fulinin	› Mideynta hannaanka, foomamka iyo tilmaamaha si waafaqo sharciga xafiiska iyo sharciga shaqaalaha rayidka ayaa loo dib dhigay sanadka 2026. › Dhammeystirka qabyo qoraal-ladda istiraatiijiyadda shaqaalaha iyo qorshaha xil-wareejinta ayaa loo xilsaaray Shirkad Mihnad u leh, 2026.
Tababarka iyo horumarinta mihnadda dhammaan shaqaalaha XHG.		› Waxa aan la fulin barnaamijka fududeynta horumarinta mihnadda ee shaqaalaha baarista iyo kuwa aan ahayn. › Waxaa qabsomay barnaamijka hagitaanka shaqaalaha maamulka sare si loo dhiso xirfadaha hogaamineed iyo kuwa farsamo. › Waxa aan la hirgelin qorshaha mihnadda qofka ee dhammaan shaqaalaha baarista. › Maamulka iyo shaqaalaha XHG ayaa ka qeybgalay tababar la xiriira shaqadooda oo ay qabteen saaxiibada heer qaran iyo heer caalami, oo uu ka mid yahay tababar heer gobol ah oo ay bixisay AFROSAI-E.		

› Shaxda 5 : Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 5aad

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Dhijintaaleyn-ta hannaanka baarista iyo kordhinta isticmaalka agabka sooftiweerka waxa ay sare u qaadayaan hufnaanta iyo tayada	› in sare loo qaado wax-ku-oolnimada iyo tayada baaritaannada oo loo raacayo hannaan baaris ku salaysan tiknoolajiyada.	› Waxaa qabsoomay Nidaamka Maareynta Qandaraasyada ee dhammaan hay'adaha dowladda si sare loogu qaado daahfurnaanta, korjoogtaynta dhijitaalka ah iyo u-hoggaansanaanta sharciga. › Waxaa si guul leh loogu tababaray Hantidhowreyaasha Excel iyo Power BI si loo hagaajiyo hannaanka falanqaynta xogta, loona kobciyo xirfadda hantidhowreyaasha. › Waxa aan la fulin carbinta turufooyinka dhijitaalka ah (Phishing Simulation) si loo hubiyo awoodda hantidhowreyaasha si ay u aqoonsadaan ugana hortagaan khataraha amniga internetka. › Waxa aan la dhisin Guddiga Hagidda ICT-da. › waxa aan la dhammaystirin Istaraatiijiyadda ICT-ga mudadii loo qorsheeyay.	Lama fuliyay	› Guddiga Hagidda ICT-da, carbinta turufooyinka dhijitaalka ah, iyo xalka Maareynta Aaladaha Guurguura (MDM), waxaa la fulin doonaa sanadka 2026. › Sanadka 2026, Dhammaan nidaamyadii la qorsheeyay waxaa lagu dari doonaa Nidaamka Macluumaadka Maareynta ee XHG si loo fududeeyo hawlaha loona xoojiyo maaraynta.
Maamul adag oo maareyn kara guud ahaan shaqaalaha XHG.		› waxa aan la qaban xuquuqaha gelitaanka isticmaalaha ee nidaamka S-SEAT. › XHG waxa uusan weli hirgelin nidaamyada dhijitaalka muhiimka ah (Waxbarshada online-ka, horumarinta shaqaalaha, Maamulka & Maaliyadda, Maaraynta Hantida, iyo la socodka qorshaynta & waxqabadka) iyo baahiyaha casriyeynta kaabayaasha shabakadda xafiiska iyo xoojinta isbeddelka dhijitaalka ah. › Waxaa dib loo dhigay hirgelinta xalka Maareynta Aaladaha Guurguura (MDM) oo loogu talagalay qalabka casriga ah sida moobeelada iyo laabtobyada XHG si loo sugo goobta ay yaallaan, loo xaqiijiyo u-hoggaansanaanta, sarena loogu qaado maamulka aaladda.		› Dhammeystirka qabyo qoraaladda Istaraatiijiyadda Teknoolijiyadda ayaa loo xil-saaray Shirkad Mihnad u leh Sanadka 2026.

› Table 5: Progress per objective for goal 5

UJEEDDO	BARTILMAAMEED	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Hagaajinta dhis-maha xafiiska iyo agabka.	› in sare loo qaado kaabayaasha iyo qalabka xafiiska si loo helo shaqo hufan.	› Waxaa la hirgeliyay Siyaasadda Maamulka Hantida XHG, (taas oo ku saleysan xeernimdaamiyeyaasha xiriirka la leh maamulka hantida qaranka). › Waxa aan la fulin in la helo goob ku filan oo ka mid ah xafiiska oo lagu keydiyo dukumentiga rasmiga ah. › Waxaa la casriyeeyay, qeyb ka mid ahna la fuliyay qorshe leh helitaan nidaamsan Iyo dayactirka dhismaha Iyo qalabka xafiiska. › Caqabado dhaqaale Iyo hortabin awgood, waxa aan lasoo iibin gawaari intii lagu guda jiray sanadka 2025.	Qeyb ahaan waa la fuliyay	› XHG waxa uu ku tala jiraa i nuu helo meel ka mid ah xafiiska oo lagu keydiyo dukumentiyada. › Soo iibsashada gaawirada waxaa loo wareejiyay sanadka 2026
xoojinta shaqada joogtada ah ee Maamulka iyo Maaliyadda XHG.	› in la xoojiyo wax-ku-oolnimada shaqada joogtada ah ee Maamulka iyo Maaliyadda gudaha XHG.	› Waxaa la diyaariyay soojeedinta qorshaha miisaaniyad sanadla ah. ee XHG, waana loo gudbiyay Wasaaradda Maaliyadda. › Waxaa la soo saaray Bayaan Maaliyadeedka rubuclaha ah, waana loo gudbiyay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee dowladda. › Waxaa la diyaariyay lana soo saaray xisaab-xirka sanadlaha ah ee XHG, waana loo gudbiyay Xafiiska Xisaabiyaha Guud; lagumase sameyn baaris ay ku sameyn lahayd shirkad hantidhowr oo madax-bannaan. › Shahaado-siinta iyo Horumarinta Mihnadda qaar kamid ah shaqaalaha Maamulka & Maaliyadda ayaan la dhammeystirin sababo dhaqaale awgood. › Waxaa shaqaalaha maamulka & maaliyadda la siiyay tababaro la xiriira iibka iyo maareynta hantida .		› Xisaab-xirka sanadlaha ah ee XHG, ee loo gudbiyay Xafiiska Xisaabiyaha Guud; oo ay ahayd in baaris ay ku sameyso shirkad hantidhowr oo madax-bannaan ayaa dib loo dhigay. › Shahaado-siinta iyo Horumarinta Mihnadda qaar kamid ah shaqaalaha Maamulka & Maaliyadda ee la qorsheeyay, waxaa loo dib dhigay 2026.

› Shaxda 6 : Ujeeddooyinka geedisocodka yoolka 6aad

UJEEDDO	BARTILMAA	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Sugidda Madax-bannaanida iyo Hirgelinta sharciga cusub ee hantidhowrka.	› In la Xoojiyo madaxbannaanida hay'adda iyo jiritaankeeda.	› Waxaa la soo Dhameystiray Siyaasadda Waaxda Sharciga iyo Xusuus-dhowrka, waxaana la waafajiyay Sharciga Hantidhowrka. › Hagaha Adeegga Sharciga ayaan weli la diyaarin. › Nidaamka Maareynta Dukumentiyada ayaan la diyaarin. › XHG waxa uu hay'adaha dowladda iyo xafiisyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya siiyay adeeg la talin oo ku saabsan sharciga, maamulka, iyo xisaabaadka. › Waxaa wacyigelin loo sameeyay madax-qeybeedyadda mashaariicda iyo guud ahaan Dadweynaha, taas oo la xiriirta fulinta Sharciga cusub ee Hantidhowrka.	Lama fuliyay	› Dhammeystirka qabyo qoraalka Hagaha Adeegga Sharciga iyo Nidaamka Maareynta Dukumentiyada ayaa loo xilsaaray Shirkad Mihnad u leh Sanadka 2026.
Sugidda maalgelin ku filan iyo taageero farsamo uu helo XHG.		› XHG waxa uu si guul leh u qabtay kulanka lix biloodlaha ah oo lalayeeshay bahwadaagta horumarinta si loo daboolayo baahiyaha maaliyadeed ee aysan haysan Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo taageerada farsamo si loo horumariyo karaanka loona xaqiijiyo baaris tayo sare leh. › XHG waxa uu diyaariyey qorshaha guud ee kheyraadka, kaas oo ka tarjumaya baahiyaha ay tahay in ay daboolaan Dowladda iyo bahwadaagta horumarinta si loo maalgeliyo fulinta qorshaha istiraatiijiyadeed. › Waxa aan qabsomin sanadka 2025, Kulanka u dhaxeeya Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Maaliyadda iyo Miisaaniyadda (GMM) oo lagu soo bandhigayay laguna sharxayay baahiyaha kheyraadka XHG.		
Sharciyad xooggan oo ku filan XHG waxa ay xaqiijineysaa in qandaraasyada dowladdu lagu sameeyo dib-u-eegis iyo diiwangelin waqtiyeysan.	› in korjoogteyn heer sare ah lagu sameeyo diiwangelinta iyo qiimaynta qandaraasyada dowladda iyo heshiisyada dheef-wadaagga ah ee leh saameyn maaliyadeed.	› Waxaa la hirgeliyay Diiwangelinta iyo qandaraas bixinta guryaha kirada ee mas'uuliyiinta dowladda. › Waxaa caqabad Dhaqaale awgeed dib loo dhigay daahfurka rasmiga ah ee Nidaamka Maareynta Qandaraasyada Hay'adaha Dowladda. › Waxa aan qabsomin shir tala-wadaag ah oo u dhexeeyay XHG iyo laanta garsoorka..		› Daahfurka rasmiga ah ee Nidaamka Maareynta Qandaraasyada Hay'adaha Dowladda ayaa loo dib dhigay sanadka 2026.

› Shaxda 7 : Ujeeddooyinka geedisocodka yoolka 7aad

UJEEDDO	BARTILMAA	GUULAHA LA GAARAY DHAMMAADKA 2025	XAALADDA	FAALADDA 2025
Harumrinta Hannaan Wadashaqayn iyo is-dhaafsi waayo-aragnimo oo u dhexeeya XHG iyo XHG-DXDFS.	› In lasoo saaro lana hirgeliyo hannaan wada-shaqeyn oo lala yeesho xafiisyada hantidhowrka dowlad-goboleedyada.	› Waxaa la saxiixay Hannaanka wada-shaqeynta ee u dhexeeya Xafiiska Hantidhowrka Guud JFS iyo Xafiisyada Hantidhowrka guud ee dowlad goboleedyada. › Waxaa si guul leh loo agaasimay loona qabtay kulan is-xog wareysi oo heer sare ah oo u dhexeeya Hantidhowraha Guud JFS iyo Hantidhowreyaasha Guud ee DXDF › XHG ee JFS ayaa ka taageeray XHG-DXDF xulashada shaqaale hantidhowr si ay u helaan mihnad ujeeddadeedu tahay kobcinta xirfadahooda ku aaddan baaritaannada maaliyadeed, u-hoggaansanaanta sharciga iyo waxqabadka ayna ku helayaan Shaahadada PESA-P.	Waa la fuliyay	
Gacan ka geysashada in la helo hannaanka baarista mideysan, iyada oo la adeegsanayo hababka lagu bartay tababarada iyo taageerada horumarinta karaanka ee khuseeya meela gooni ah.		› Caqabado dhaqaale awgood, Waxa aan suurtagelin in XHG uu bixiyo tababaro guud ee kobcinta karaanka XHG-DXDFS oo la xiriira hannaanka sharciga iyo xeerarka, Habraacyada Baarista Maareynta maaliyadeed iyo warbixinta, Baarista Fatashka, Xirfadaha hoggaaminta iyo maamulka iyo horudhaca hannaanka danbeynta baarista.	lama fuliyay	› Tababaradda la xariira Kobcinta karraanka ee XHG-DXDFS, waxaa la fulin doonaa sanadaha xigga.



Hantidhawrka Guud ayaa shir-guddoomiyey kulanka fogaan-aragga ah ee lix-biloodlaha ee bahwadaagta Horumarinta, Nofeembar 19, 2025.



Hantidhowrada Labada Heer ee JFS oo Muqdisho ku kala saxiixday habraac iskaashi oo xoojinaya wada-shaqaynta, isku-dubaridka iyo baarista wadajirka ah.

4. HAWLAHA BAARISTA IYO NATII-JOOYINKA

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu xoogga saaray sare u qaadista baaxadda iyo tayada baaritaannada uu sameeyo. Dadaalladaan istaraatiijiyadeed waxaa looga dan leeyahay kobcinta baaxadda hawlaha baarista, iyada oo la hubinayo in ay ku jiraan hay'ado kala-duwan iyo hawlo maaliyadeed. Sidaas, waxa uu XHG ku raadinayaa inuu xoojiyo isla-xisaabtanka iyo daahfurnaan maareynta maaliyadda guud.

Intaas waxaa dheer si loo ballaariyo baaxadda baarista, XHG waxa uu sidoo kale diiradda saaray horumarinta tayada guud ee hab-raaca baaritaanadiisa. Tani waxa ay qeyb ka tahay fulinta dhaqamada hirgalay iyo heerarka adag ee xaqiijinaya in dhammaan baaritaanada ay noqdaan kuwo dhammaystiran, madax-bannaan, wax-ku-ool ah oo suurtagelinayana in la ogaado meelaha u baahan horumarinta hay'adaha la baaray.

Si loo fududeeyo helintaanka iyo fahanka natiijooyinka baarista, XHG waxa uu warbixinnadiisa ku daabacaa afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska. Habkan labada luqadood ah waxa uu xaqiijiyaa in warbixintu gaarto cid walba oo ay ka mid yihiin daneeyeyaa-sheena, madaxda dowladda, iyo guud ahaa dadweynaha, tani waxa ay sare u qaadaysaa isla-hawgalka sare iyo fahanka ujeedooyinka baarista.

Dadaalladan joogtada ah ayaa XHG diiradda ku saarayaa dib-u-habaynta dowladda ah in uu hormuud u yahay sare u qaadidda dowlad wanaagga iyo mas'uuliyadda maaliyadeed, si uu ugu dambayn uga qeyb-qaato hagaajinta adeeg bixinta guud ee hay'adaha dowladda.

4.1. Warbixinnada Baarista Ee 2025

4.1.1. Warbixinta Baarista Maaliyadeed

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa uu soo saaray baarista sanadlaha ah ee lagu sameeyay Xisaab-xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee sanad maaliyadeedka dhammaaday Diseembar 31, 2024.

Baarista waxaa la fuliyay iyada oo la raacayo sharciyada dalka iyo heerarka caalami-ga ah ee hay'adaha hantidhowrista sare (ISSAIs). Xisaab-xirka maaliyadda dowladda ee uu diyaariyay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ayaa ah mid lagu jaangooyay Halbeegga Adeegsiga Lacagta Caddaanka ah sida ku cad Heerarka Caalamiga ee Xisaabaadka Dowladda (IPSAS). Hannaankani waxa uu caawinayaa in qiimeyn madax-bannaan lagu sameeyo xisaab-xirka maaliyadeed, lana xoojiyo hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo wax-ku-oolnimada maareynta kheyraadka guud.

Baarista xisaab xirka maaliyadda dowladda ee sanad maaliyadeedka 2025 ee uu sameeyay XHG waxaa kasoo baxday natiijo ah Aragti Cillad leh.

Natiijooyinka ugu waaweyn ee kasoo baxay Baaris Maaliyadeedka 2025, waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

1. Dakhli dhan US\$32.21. Milyan oo kasoo xarooday heshiisyada dheef-wadaagga ah ee Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Aadan Cadde iyo Dekedda Muqdisho lama xaqiijin karin sababtoo bayaannada maaliyadeed ee heshiisyada dheef-wadaagga ah ayaan baaris lagu sameyn, sida ku xusan heshiisyada khu-seeya.
2. kala duwanaansho ahmiyadda leh oo u dhexeeya miisaaniyadda qoondaysnayd iyo midda dhabta ayaa lagu ogaaday bayaanka isbarbardhigga miisaaniyadda iyo midda dhabta ah. Farqigaan si sax ah looguma sharrixin bayaanka maaliyadda dhexdiisa, taas oo aan waafaqsanayn shuruudaha lagu xusay Halbeegga Adeegsiga Lacagta Caddaanka ah ee lagu qeexay Heerarka Caalamiga ee Xisaabaadka Dowladda (IPSAS).

Hantidhowraha Guud ayaa warbixintan si rasmi ah ugu gudbiyay Ra'iisul Wasaaraha, labada Aqal ee Baarlamaanka FS, Madaxweynaha JFS, Juun 30, 2025. Gudbin-tan xilliyaysan waxa ay muujinaysaa sida ay Hantidhowraha Guud uga go'an tahay xoojinta hufnaanta, isla-xisaabtanka maamulka maaliyadda iyo wax-ku-oolnimada maareynta kheyraadka guud.

4.1.2. Warbixinta Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga

Sannadka Maaliyadeedka 2025, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu fuliyay Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ee sanadlaha ah oo koobaysa 21 hay'adood ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Hay'adaha waxaa lagu xushay iyadoo la raacayo qorshaha Qiimeynta Khataraha. Baaritaanada waxaa loo fuliyay si waafaqsan Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare (ISSAIs 4000). Heerarka baarista U-hoggaansanaanta sharciga iyo sharciyada dalka ee xiriirka la leh oo ay ka mid yihiin Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud (sharci Lr. 14, 2023), Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (sharci Lr. 17, 2019), Sharciga libka Qaranka (sharci Lr. 22, 2016) iyo wax-ka-beddelkiisa (Sharci Lr. 20, 2020).

Baaristan U-hoggaansanaanta Sharciga ayaa diiradda lagu saaray goobaha khar-tartoodu sarrayso oo ay ka mid yihiin libka qaranka, Maareynta Hantida, Uruurinta Dakhliga, ka Faa'iideysiga Deeqaha Dibedda, Hababka Baarista Gudaha, Maareynta Xisaabta Bankiga, Korjoogtaynta Kalluumeysiga, Maareynta Shaqaalaha, Dii-waangelinta Adeegbixiyaha iyo hawlaha-sharci ee shaqooyinka gaarka ah. Ujeed-dada baaristu waxa ay ahayd in la qiimeeyo in hay'adaha dowladda ay raaceen sharciyada dhaqangalka ah, xeernidaamiyeyaasha, iyo habraacyada la dejiyay, iyo in la aqoonsado nugaylka nidaamka iyo wax-ku-oolnimada maareynta maaliyadda guud iyo adeeg bixinta.

Natijoooyinka Muhiimka ah ee kasoo baxay Baaris U-hoggaansanaanta Sharciga 2025, waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

› **Deeqaha Dibadda iyo Xisaabta Bankiyada (SFMIS)**

Lix (6) hay'adood ayaa helay oo isticmaalay deeqo dibadeed oo dhan US\$5.05 milyan oo aan lasoo marin khasnadda Dhexe ee Midaysan (TSA), sidoo kalena aan lagu isticmaalin nidaamka SFMIS-ka, taas oo ah jabin Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud. Intaa waxaa dheer, afar (4) hay'adood ayaa furtay toddoba iyo toban (17) xisaab banki ee bankiyada ganacsiga iyaga oo aan raacin habraacyada oggolaanshaha ee sharcigu dhigayo.

› **Maareynta Kalluumeysiga**

Baarista u-hoggaansanaanta ee lagu sameeyay Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dh-aqaalaha Buluugga ah waxa lagu ogaaday konton iyo toddoba (57) markab oo looga shagiyay kalluumeysi sharci darro ah, aan laga warbixin, aan la ogolaanin (IUU Fishing) ee gudaha Aagga Dhaqaale Gaarka ah ee Soomaaliya (EEZ) sanadkii 2024. Maraakiib dhowr ah ayaa damiyay Nidaamka Aqoonsiga Degdegga ah (AIS) ama isticmaalay aqoonsi been ah, taas oo ka hor imanaysa sharciga Kalluumeysiga (Sharci Lr. 008, 2023).

› **Maareynta Shaqaalah**

Toban iyo Kow (11) hay'adood ayaa shaqaaleysiiyay 769 shaqaale iyaga oo aan la raacin habraacyada shaqaaleysiinta ee la ansixiyay iyo nidaamka mushaar bixinta. Intaas waxaa dheer, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa bixisay rukhsado shaqo oo gaaraya 4,536 shaqaale oo ajnabi ah iyada oo aan la dhisin Guddiga Qiimeynta Shaqaalaha Ajaanibta ah ee sharcigu farayay ama aan la soo saarin xeer-nidaamiyeyaal la xiriira shaqooyinka xaddidan.

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ayaa muujisay in ay jiraan daldaloollo dhan-ka u-hoggaansanaanta sharciga iyo xakamayn la'aan ka jirta dhammaan Hay'adaha Dowladda ee la baaray. Lacagaha deeqaha dibadeed ee la helay ayaa loo isticmaalay iyada oo aan la marin khasnadda Dhexe ee Midaysan (TSA) iyo hannaanka SFMIS, waxaana sidoo kale la furay dhowr xisaab banki oo aan haysan oggolaansho sax ah, taas oo baal marsan sharciga maareynta maaliyadda guud. Dhanka kalluumeysiga ayaa laga ogaaday inay jirto kalluumeysi sharci darro ah baahsan, aan laga warbixin lana ogolaan (IUU), taas oo cadeysay nugayl korjoogtayn iyo fulin sharci. Sidoo kale, shaqaaleysiinta shaqaale oo aan loo raacin xeer-nidaamiyeyaasha shaqaalaha rayidka ee la ansixiyay, iyo bixinta rukhsadaha shaqada oo aan loo marin hanaan sharci ah ayaa si cad u muujinaysa nuglaanta xakamaynta ka jirta Maareynta Shaqaalaha. Natijoooyinkan waxa ay si cad u muujinayaan in baahi degdegga ah loo qabo in la xoojiyo hannaanka U-hoggaansanaanta sharciga, iyo xeeraraka la adkaeeyo xakamaynta gudaha, lana hagaajiyo hababka isla xisaabtanka si loo ilaaliyo hantida guud loona horumariyo tayada adeegyada la bixiyo.

Hantidhowraha Guud waxa uu Warbixinta Baarista U-hoggaansanaata Sharicga, si rasmi ah ugu gudbiyay Ra'iisul Wasaaraha, Labada Aqal ee Baarlamaanka FS iyo Madaxweynaha JFS Juun 30, 2025. Gudbintan waxa ay muujinaysaa sida ay Hantidhowraha Guud uga go'an tahay xoojinta hufnaanta, isla-xisaabtanka maamulka maaliyadda iyo wax-ku-oolnimada maareynta kheyraadka guud.

4.1.3. Warbixinta Baarista Gaarka ah

Intii lagu jiray muddada warbixinta 2025, XHG waxa uu fuliyey shan (5) baaris gaar ah oo laga fuliyey meelaha ay ka jiraan khataro sare kuwaas oo saameyn weyn ku leh hay'adaha dowladda.

1. Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Qaranka (SoDMA);

Baaris gaar ah ayaa lagu sameeyey Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Qaranka, iyada oo ahmiyadda la siiyay howlaha maaliyadeed ee degdegga ah iyo kuwa shaqo. Baarista gaar ka ah waxa ay diiradda saaraysaa arrimaha baarista loo xulay ee la xiriira maareynta deeqaha lacageed iyo kuwa aan ahayn, iibka xaaladaha degdegga ah, hababka qaybinta gargaarka, hannaanka hubinta ka-faa'iideystayaasha, iyo hufnaanta iyo daahfurnaanta barnaamijyada lacag-bixinta tooska ah. Baaristu waxa ay sidoo kale la qiimeeysay wixtarka xakamaynta gudaha, u-hoggaansanaanta sharciyada dhaqangalka ah iyo xeernidaamiyayaasha.

2. Agaasinka Guud ee Dakhliga

Baaris gaar ah ayaa lagu sameeyey Agaasinka Guud ee Dakhliga, iyada oo diiradda lagu saaray dardargelinta dakhliga gudaha iyo nidaamyada xakamaynta, ee arrimaha baarista loo xulay ee habraacyada wadaagga canshuurta kirada ka soo xarootay, iibka, bixinta iyo adeegsiga mashiinnada POS ee uruurinta canshuurta gadista (VAT), hannaanka maamulka canshuur dhaafka, in Nidaamka Dakhliga lagu xiro SFMIS, hababka xakamaynta gudaha, maareynta xogta maaliyadeed, iyo u-hoggaansanaanta wareejinta dakhliga ee khasnadda Dhexe ee Midaysan (TSA) .

Ujeedada baarista waxay ahayd in la qiimeeyo wixtarka nidaamyada maamulka dakhliga iyo in la ogaado meelaha ay ka jiraan dulduleelo saameyn kara isla-xisaabtanka iyo hubinta dakhliga.

3. Safaaradaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Saddex baaris oo gaar ah ayaa lagu sameeyey safaarado la xulay si loo xoojiyo korjoogteynta maaliyadeed iyo maareynta maamulka ee wakiillada arrimaha dibadda. Safaarada JFS ee Djibouti, Safaaradda JFS ee Kenya, iyo Safaaradda JFS ee Turkiye.

Baaxadda Guud ee Goobaha la Baaray.

- › **Maamulka Dakhliga:** (oo uu ka mid yahay u wareejinta dakhliga la aruuriyay khasnadda Dhexte ee Midaysan (TSA) iyo ka warbixinta u-hoggaansanaata.
- › **Maamulka Kharashaadka:** (oo uu ka mid yahay dukumiintiyo ku filan caddeyn iyo u-hoggaansanaanta habraacyada maaliyadeed).
- › **Maamulka Deymaha:** (Diiwaangelinta iyo dabagalka deymaha taagan).
- › **Maareynta Hantida:** (Ilaalinta isticmaalka iyo dayactirka hantida guud).
- › **Maamulka shaqaalaha:** (Shaqaalaysiinta, Maareynta Waxqabadka, Tababbarka iyo U-hoggaansanaanta xeerarka)

Hirgelinta baaristaan gaarka ah waxa ay muujinaysaa sida ay uga go'an tahay in XHG ee sare u qaadinta isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda, xoojintanidaamyada xakamaynta gudaha, iyo ilaalinta hantida guud ee gudaha iyo dibadda dalka.

4.1.4. Warbixinta Baarista Nidaamyada Tiknoolajiyadda

Intii lagu jiray muddada warbixinta, XHG ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa uu sameeyay baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS Audit) ee qaar ka mid ah nidaamyada muhiimka ah ee dowladda. Si loo hubiyo u-hoggaansanaantooda heerarka caalamiga ah iyo hannaanka dhaqangalay.

Si waafaqsan Qorshe-sanadeedka Guud ee Baarista, waxa fuliyay afar (4) baaris ee Nidaamyada Macluumaadka (IS). iyada oo la isticmaalayo hab ku saleysan khataraha halbeegyada la xulay. Halbeegyadaas waxaa kamid ah muhiimadda ay nidaamyadu u leeyihiin dalka, saameynta ay ku leeyihiin adeegyada bulshada, kakanaanta iyo isdhegelinta nidaamka, danaha daneeyayaasha, waafajinta ujeedooyinka istiraajiyadeed ee Qaran, iyo khataraha la xiriira hawlaha iyo khataraha tiknoolajiyadeed. Intaas waxaa dheer hal baaris oo dabagal ah ayaa la fuliyey si loo qiimeeyo xaaladda fulinta talooyinkii hore loo soo saaray ee nidaamyada la baaray. Intii sanadkan lagu guda jiray waxaa la dhameystiray Baarista nidaamyadda macluumaadka, taas oo koobeysa nidaamyaddan soo socda:

1. Nidaamka Diiwaangelinta Ganacsiga Soomaaliyeed (SBRS) ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, kaas oo diiradda lagu saarey xakameynta taageerada diiwaangelinta ganacsiga, maareynta xogta, amniga, iyo kalsoonida nidaamka.
2. Nidaamka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada (EMIS)/Guddiga Imtixaanadka Qaranka (SONEB) ee Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, kaas oo lagu qiimeeyay xakameynta maaraynta imtixaanaadka, hannaanka natiijooyinka, iyo saxnaanta xogta.
3. Nidaamka Macluumaadka Maareynta Caafimaadka (HMIS) ee Wasaaradda Caafimaadka, Daryeelka Bulshadda, kaas oo dib-u-eegis lagu sameeyey keydka xogta caafimaadka qaranka (DHIS2), iyada oo awooda la saarey kalsoonida xogta, xakameynta gelitaanka, iyo joogtaynta nidaamka.
4. Nidaamka Maareynta Aqoonsiga Qaranka ee Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka (NIRA) oo lagu qiimeeyay amniga nidaamka, ilaalinta xogta, iyo kalsoonida adeegyada aqoonsiga Qaranka.
5. Intaa waxaa dheer, waxaa la sameeyay Baaris Dabagal ah oo ku saabsan Nidaamka Uruurinta Canshuuraha Furdada ee Soomaaliyeed (SOMCAS) ee Wasaaradda Maaliyadda, si loo qiimeeyo maareynta fulinta talooyinkii hore ee la xiriiray xakameynta IT-da, amniga.

Guud ahaan, Baarista Nidaamiyada Macluumaadka waxa ay soo bandhigtay kalsooni la isku haleyn karo oo ku saabsan xakameyn wax-ku-ool ah ee nidaamyada adag ee macluumaadka dowladda, waxaa ayna muujisay meelo u baahan dadaalo maamul oo lagu xoojinayo nimaadka dowladda, amniga iyo hawlaha adkeysiga.

4.1.5. Warbixinta Baarista Waxqabadka 2025

Sanadka 2025, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa fuliyay baarista waxqabadka oo koobaysa labo adeeg oo kala ah; adeegyada caafimaadka hooyada ee hoos yimaada Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, iyo xaaladaha xabsiyada ee Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed oo ay ka mid yihiin Xabsiga Dhexe ee Xamar iyadoo baaxadda baaristu daboolaysay muddada u dhaxeysay 2020 ilaa 2024.

Qeybta caafimaadka, heerka dhimashada hooyooyinka xilliga uurka iyo dhalmada ayaa weli aad u sarreeya, iyada oo gaartay 563 dhimasho ah, 100,000 dhalmo kasta ah (2023, kana sarreeya bartilmaameedka yoolalka Qaranka iyo kuwa Horumarinta Waara. Caqabadaha ugu waaweyn waxaa ka mid ah helitaanka adeegyada degdegga ah ee dhalmada oo xaddidan isla markaana aan si siman dalka uga jirin, gaar ahaan meelaha ka baxsan Muqdisho, wadashaqeynta hay'adaha oo daciif ah, miisaaniyad caafimaad oo hooseysa (5.46% miisaaniyadda qaranka), hoos u dhac ku yimid shaqaalaha umulisoooyinka tababaran (32%), iyo nidaamyada xogta caafimaadka oo liidata. Arrimahan ayaa si toos ah hoos u dhigay waxqabadka dadaallada lagu yareynayo dhimashada hooyooyinka.

Dhanka Cadaaladda, xaaladaha ka jira xabsiga ayaa weli kuwo liita ah, iyada oo ay muuqdaan in ay jirto ciriiri xad-dhaaf ah, hoy aan ku filnayn, nadaafada liidata, adeegyada cunto oo xumo, iyo caafimaad oo aan ku filnayn. Intaa waxaa dheer, maxaabiista inta badan ma helaan adeegyada aasaasiga ah waxaana mararka qaar laga codsadaa in ay iska bixiyaan daaweynta caafimaadka. Xaaladahani waxa ay si taban u saameeyaan caafimaadka, amniga, iyo dhowrista sharafta maxaabiista.

Guud ahaan, horumarka labada qeybood ayaa wali xadiddan. Caqabadaha la xiriira bixinta adeegyada, qoondaynta kheyraadka, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo isku-duwidda nidaamka isku xirka ayaa si joogta ah u saameynaya natiijooyinka larabo in la gaaro. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in la xoojiyo maalgelinta, la hagaajiyo maareynta nidaamyada, iyo in la sameeyo dib-u-habeyn bartilmaameed leh ayaa loo baahan yahay, si loo kordhiyo waxqabadka loona gaaro yoolalka horumarineed ee Qaranka.

4.2. Warbixinta Baarista Mashaariicda ay Deeq-bixiyeyaasha Maalgeliyeen, 2025

Sannad Maaliyeedkii 2025, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu fuliyay labo iyo labaatan(22) mashruuc oo ka mid lix iyo labaatan (26) mashruuc oo horay loo qorsheeyay, kuwaas oo ka mid ah mashaariicda uu maalgeliyay Bankiga Adduunka.

Baaritaannadan ayaa lagu fuliyay si waafaqsan Hagaha Baarista Maaliyadda ee XHG ee JFS, waxaana loo xil-saaray shirkado baaris oo heer caalami ah, si loo hubiyo in la raacay Hab-raacyada Caalamiga ee Hantidhowrista (ISAs), shuruucda dalka, heshiisyada deeq-bixiyeyaasha iyo hannaanka dhaqangalay ee caalamka

Iyada oo loo kuurgalayo dhaqdhaqaaqa maaliyadeed iyo hannaanka fulinta, baaristu waxa ay bixisay tilmaamo mug leh oo ku saabsan wax-ku-oolnimada ee isticmaalka lacagaha deeqaha ah, waxaana awooda la saaray bixinta tallooyin wax-ku-ool ah ee horumarin. Dadaalkan, waxa uu XHG-JFS ku xaqiijiyay madax-bannaanida iyo saxnaanshaha, iyada oo la siiyay bahwadaagta horumarinta xaqiijin ku aadan isticmaalka lacagaha.

5. HUBINTA TAYADA IYO HEERARKA MIHNADEED

XHG ee JFS waxa uu hirgeliyay xakameynta habraacyada tayada iyo mihnadda dhammaan hawlaha baarista. Sannadka 2025, XHG waxa uu awooda saaray hababka xakameynta tayada gudaha, isaga oo raacaya heerarka caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare (ISSAIs), sidoo kalana, waxa uu adkeeyay shuruudaha u-hoggaansanaanta anshaxa.

5.1. Hababka Xakamaynta Tayada Gudaha

Si loo hubiyo tayada iyo kalsoonida warbixinada baarista, XHG waxa uu fuliyay hababka xakamaynta tayada soo socda:

- ▶ Nidaamka Aaladda Horumarinta Baarista Xafiiska Hatidhowrka Guud ee Soomaaliya (S-SEAT), waraaqaha shaqada waxaa loo adeegsadaa xakamaynta tayada baaritaannada maaliyadeed iyo u-hoggaansnaanta sharciga. Si loo xoojiyo xakameynta tayada baarista iyo maareynta korjoogteynta, XHG waxa uu si nidaamsan u adeegsadaa waraaqaha shaqada, waxa uuna ku fillayaa la-socodka xakameynta tayada ee baaritaannada maaliyadeed iyo u-hoggaasanaanta sharciga, si loo xaqiijiyo sax-ahaanta, iswaafaqsanaanta iyo ilaalinta halbeegyada mihnadeed.
- ▶ La-socodka Hubinta Tayada: dhammaan warbixinadda baaristu waxa ay maraan habraacyo dib-u-eegis marxaladaha kala duwan ee hannaanka baarista oo ay ku jiraan dib-u-eegista hoggaanka kooxda baarista, kormeerayaasha, iyo maamulka sare.
- ▶ La tashiyada farsamo ee la taliyeyaasha: XHG waxa uu la tashtaa la-taliyeyaasha farsamo ee shaqeeya si loo helo aqoon gaar ah iyo hagid ku saabsan arrimaha adag ee baarista.

- › Joogtaynta Horumarinta mihnadeed: Shaqaalahu waxa ay ka qeyb-qaateen hawlaha joogteynta horumarinta mihnadeed si sare loogu qaado xirfadahooda farsamo loona adkeeyo kartidooda mihnadeed.

Dib-u-eegis bannaanka ah: dib-u-eegista saaxiibdu la sameeyaan kooxaha

XHG waxa uu si dhab ah u raadiyaa jawaab-celin iyo qiimeyn bannaanka ah si uu sare ugu qaado waxqabadkiisa isla markaana uu ula jaanqaado hannaanada caalamiga ah ee dhaqan galay. sannadkii 2025, XHG waxaa lagu sameeyay dib-u-eegisyo muhiima oo bannaanka ah, oo ay ka mid tahay Dib-u-eegista xaqiijinta tayada ee AFROSAI-E, taas oo la fuliyay muddada warbixinta. AFROSAI-E waxa ay soo gudbisay Warbixinta Xaqiijinta Tayada, waxaana XHG looga baahday in ay diyaariyaan qorshe hawleed, ayna wax ka qabtaan daldaloolada lagu xusay warbixinta si loo fuliyo.

Intaa waxaa dheer, Qiimeynta Mashruuca SERP ee Bankiga Adduunka waxa ay ahayd mashruuc muhiim u ah XHG. Qiimeyntani waxa loo sameeyay si loo ogaado Karaanka hay'adeed ee XHG iyo Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda ee Baarlamaanka, iyo in la siiyo talooyin wax ku ool ah oo lagu xoojinayo awooddooda si ay si wax ku ool ah ugu gutaan waajibaadkooda.

Qiimeyntu waxa ay cadeysay meelaha hortabinta leh ee caawinta farsamo iyo dhisidda karaanka saddexda ilaa afarta sano ee soo socota, ee mashruuca SERP uu taageeri doono. Ujeeddada guud waa kor u qaadidda maamul-wanaagga, isla-xisaabtanka, iyo maareynta wax ku oolka ah ee kheyraadka guud, iyada oo la hubinayo horumarinta karaanka hay'adeed.

XHG ee JFS waxa uu dhammaystiray sanadka 2025 Is-Qiimeynta Hannaanka Dhis-maha Karaanka Hay'adda (ICBF), taas oo qayb ka ah cabbirka waxqabadka hay'adeed ee sanadlaha ah ee AFROSAI-E. Hannaanka Dhismaha Karaanka Hay'adda (ICBF) waa aalad muhiim ah oo heer gobol ah oo ay isticmaalaan Hay'adaha Hantidhowrista Sare si ay u qiimeeyaan kobaca hay'adeed, wax-ku-oolnimada, iyo horumarka laga gaaray daldaloolada karaanka ka jira, hoostana ka xariiqeysta aragtida is badalka qorshaha Istiraatiijiyadeed 2025-2029 ee AFROSAI-E.

Qiimeyntani waxa ay siisay XHG hab nidaamsan oo dhexdhexaad ah oo lagu qiimeeyo karaanka hay'adeed, lagu soo bandhigo daldaloolada ka jira kobaca hay'adda, isla markaana lagu daba-galo horumarka waqti ka dib. Ka qaybgalka joogtada ah ee hannaanka ICBF waxa uu sidoo kale gacan ka geystay adkeynta waxqabadka guud iyo maareynta isbeddelka ee Qorshaha Istiraatiijiyeed 2025-2027 ee XHG.

Warbixinta Is-qiimeynta ICBF ee Gobolka waxa si ballaaran u aqoonsan daneeyayaa-sha iyo bahwadaaggta horumarinta inay tahay aalad lagu kalsoonaan karo oo lagu kormeero horumarka hay'adeed, taas oo kor u qaadaysa kalsoonida iyo isla xisaabtanka natiijooyinka is-qiimeynta. Xaaladdan, iyadoo taas laga duulayo XHG waxa uu isticmaalay madasha elektarooniga ah ee Questback si ay si buuxda u dhammaystiro su'aalaha Is-qiimeynta ee ICBF 2025. Maaddaama nidaamku xadidayo codsiga dhammeystirka hal waqtiyo, XHG waxaa uu hubiyay diyaar-garow gudaha ah iyo isku-dubbarid ku filan si loo dhammaystiro qiimeynta hal mar.

Intaa waxaa dheer, XHG waxa ay ka qayb qaadatay Aqoon-is-weydaarsiga fogaan aragga ah ee Dhammaystirka ICBF ee AFROSAL-E, kaas oo la qabtay Janaayo 20, 2026, kaas oo loogu talagalay maamulka sare iyo kooxaha loo xilsaaray. Aqoon-is-weydaarsigan waxa uu caddeeyay halbeegga qiimeynta, waxa uu wax ka qabtay arrimaha farsamada, isla markaana waxaa looga dooday caqabadaha guud, taas oo ka qayb qaadatay hagaajinta iswaafaqsanaanta iyo tayada jawaabaha.

Guud ahaan, Is-Qiimeynta ICBF ee 2025 waxa ay xoojisay warbixinta waxqabadka hay'adeed ee XHG iyada oo bixisay qiimeyn ku salaysan caddeyn ku saabsan kobac karaanka, taas oo gacan ka gaysatay iswaafajinta ujeedooyinka istiraatiijiyadeed, natiijooyinka hubinta tayada, iyo guulaha waxqabadka sannadlaha ah, iyada oo isla markaana iftiimisay meelaha hortabinta u leh horumarinta mustaqbalka hay'adda.

5.2. U Hoggaansanaanta Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhawrista Sare (ISSAIs)

Laga billaabo sanadka 2015, XHG waxa uu ballanqaaday in uu u-hoggaansamo Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhawrista Sare (ISSAIs) inti lagu guda jiray dhammaan hawlaha baarista. Heerarka ISSAIs waxa ay bixiyaan hannaan dhammaystiran oo loogu talagalay baaris tayo sare leh oo lagu samaynayo hay'adaha dowladda, sarena loogu qaadayo madax-bannaanida, dhexdhexaadnimada, iyo mihnadda.

Isticmaalka Hagayaasha Baarista ee waafaqsan ISSAI, hirgelinta habraacyada xakamaynta tayada, iyo horumarinta joogtada ah ee mihnadda shaqaalaha ayaa muujinaya dadaalladii tobanka sano.

5.3. Heerarka Anshaxa iyo U Hoggaansanaanta Xeerka Anshaxa

XHG waxa uu si weyn diiradda u saaray ilaalinta anshaxa xirfadeed iyo u-hoggaansanaanta Xeerka Anshaxa ee dalladda INTOSAI. Dhammaan shaqaalaha xeerkani waxa uu ku waajibinayaa in ay ilaaliyaan sare u qaadida sharafta, dhexdhexaadnimada iyo mihnadda. Sanadkii 2025, XHG waxa uu cusboonaysiiyay dib-u-eegisna lagu sameeyey u-hoggaansanaanta xeerka anshaxa, isla markaana waxa uu qabtay kulamo wacyigelin ah si loo xoojiyo fahamka iyo ku dhaqanka anshaxa. Sidoo kale, hababka lagu soo sheego xadgudubyada anshaxa iyo siyaasadaha loogu talagalay ka hortagga isku-dhacyada danaha waxay xaqiijiyaan hufnaan, isla-xisaabtan, iyo dhexdhexaadnimo dhammaan hawlaha xafiiska.

Intaa waxaa dheer, hirgelinta ISSAI, tayada Baarista, iyo u hoggaansanaanta xeerka anshaxa, XHG waxaa sharaaf u ah diyaar u ahaanshihiisa ka qaybqaadashada iyo wax ku biirinta guddiyada shaqo ee yoolalka INTOSAI. Sannadkan, XHG waxa uu si rasmi ah ugu biiray Guddiga Dhisidda Awoodda ee ARABOSAI, kadib markii xubinnimadiisa lagu ansixiyay kulankii 70aad ee Golaha Fulinta ee lagu qabtay Jeddah Deseber, 2025. Xubinnimadani waxa ay u sahashay XHG inuu ka qeybqaato bar-naamijyada tababarka ee waafaqsan Heerarka Caalamiga ee Hay'adaha Hantid-

howrista Sare(ISSAIs), taas oo xoojineysa in horumarinta Mihnadeed ee heer gobol leh awood farsamo oo ku habboon heerka caalamiga. Ka qaybqaadashada guddigan heerka sare ah, XHG waxa ay u suura galisay taageerda iskaashiga mihnadeed iyo aqoon isweydaarsi iyadoo loo marayo iskaashi dhow iyo is-weydaarsiga aqoonta ee hay'adaha hantidhawista sare ee dalalka Carabta.

La hawlgalkan, waxa ay muujinaysaa sida XHG ay uga go'an tahay hirgelinta Heerarka Caalamiga ee Hantidhowrista, xoojinta karaanka hay'adda, iyo kobcinta aqoon isweydaarsiga. XHG waxa uu si wax-ku-oolnima leh u la jaanqaaday hababka baarista ee dhaqamadda hirgalay, waxa uuna si firfircoon uga qayb qaatay horumarinta heerarka mihnadeed, waxa uuna xaqiijiyay isku xirnaanta baaritaanada Wax-qabadkaKa, U-hoggaansannaata harciga iyo Baarista gaarka ah iyada oo loo marayo dadaalladaan.Iyadoo loo marayo ka qaybqaadashada guddiyada shaqo ee INTOSAI, sanadka 2026, waxa ka go'an hirgelinta ISSAIs si joogto ah iyo xoojinta iskaashiga uu la leeyahay hay'adaha kale ee hantidhowrista sare (SAIs)

Dadaalka tobanka sano jirey XHG ee ku aaddan hirgelinta ISSAIs, ilaalinta anshaxa, iyo dhisidda iskaashi xooggan waxa uu ka tarjumayaa qiyamka asaasiga ah ee xafiiska kuwaas oo ay ka mid yihiin mihnad, hal-abuur, iskaashi, iyo isbeddel muuqda. Tani waxay horseedaysaa horumar joogto ah oo ku yimaadda tayada hantidhowrista iyo isla xisaabtanka hay'adaha dowladda.

6. LA HAWLGALKA DANEEYAYAASHA

XHG waxa uu garwaaqsan yahay in ka-qaybgal wax ku ool ah oo lala yeesho daneeyayaashu uu muhiim u yahay gaaridda ujeedooyinka istiraatiijiyeed ee xafiiska iyo kor u qaadidda isla xisaabtanka guud . Sannadkii 2025, xafiisku waxa uu si firfircoon ula shaqeeyay Baarlamaanka, hay'adaha dowladda, bulshada rayidka, iyo bahwadaagta horumarinta si loo xoojiyo saameynta hantidhawrista iyo daahfur-naanta.

› La-shaqeynta Baarlamaanka

XHG waxa uu siiyayaa baarlamaanka warbixinno wakhtiyeysan, leysku haleyn karo si loo taageero doorkiisa korjoogteenta ee baarlamaanka kormeerka. Inkasta oo aqoon-is-weydaarsiyadii wacyigelinta loogu talagalay Baarlamaanka, ee doorka XHG iyo noocyada cusub ee baarista, ay dib u dhaceen, haddana waxa jira qorshayaal loogu talagalay sannadka 2026 si loo xoojiyo ka-qaybgalka baarista iyo korjoogteynta, baarlamaanka iyadoo laga faa'iidayo sanayo khibradaha hay'adaha hantidhowrista sare (SAIs) iyo AFROSAl-E.

› Iskaashiga Hay'adaha La baaray

Xafiisku waxa uu dhowray xiriirka wanaagsan uu la yeeshay hay'adaha dowladda, si loo hubiyo in hay'adaha la baaray ay fuliyaan natiijooyinka talooyinka baarista. isla markaana ay ka qayb qaataan hirgelinta talooyinka. Kulamo dabagal ah ayaa la qabtay si loo hubiyo in talooyinka hantidhawrku ay horseedaan horumar ku yimaada maareynta maaliyadda dadweynaha.

› Warbaahinta

Warbaahinta oo ah isha ugu muhimsan ee ay bulshadu ka qaadata xogta, waa buun-

do muhiim u ah isku xirka XHG iyo bulshada, si loo hubiyo in bulshadu ay xog-ogaal u tahay natiijada baarista iyo daahfurnaanta hay'adaha dowladda. iyada oo la baahinayo shaqooyinka, guulaha, iyo caqabadaha XHG, warbaahintu waxa ay qaabeysaa fahanka bulshada waxa ayna xoojisaa isla-xisaabtanka. XHG waxa uu si toos ah xiriir ula leeyahay warbaahinta, isaga oo bixinaya wareysiyo, war-saxaafadeed iyo warbixinnada rasmiga ah si bulshada u gaarto warbixinta baarista iyo natiijada ka soo baxda si qayaxan oo sax ah. Taas ayaana gacan ka geysanaysa kor u qaadista fahamka dadweynaha ee warbixinnada hantidhowrka.

► **Bulshada Rayidka iyo Ka-qaybgalka Dadweynaha**

Ururrada bulshada rayidka ah waxa ay ka mid yihiin daneeneyaasha muhiimka ah ee XHG oo si garab istaag ah noola falgala, Waxa ayna ka tarjumaan baahiyaha bulshada, waxa ay dhiirrigilyaan hufnaanta, xoojinta isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta maareynta hantida guud. Ururadan waxa ay sidoo kale dowlad muhiim ah ka qaataan u qareemidda iyo doodaha siyaasada, taas oo waafaqsan himilada XHG. wada-shaqeynta bulshada iyo XHG, ayaa sare u qaadeysa saameynta baarista iyo ka qeybgalka bulshada kormeerka guud ee hay'adaha dowladda.

► **Iskaashiga Caalamiga ah**

XHG waxa uu si firfircoon uga qayb qaatay shirar, aqoon-is-weydaarsiyo, iyo iskaash, taas oo ka qayb qaadatay xoojinta xiriirrada shaqo, horumarinta heshiisyada afgaradka ah (MOU-yada), iyo ka faa'iidaydiga khibradaha iyo habraacyada ugu wanaagsan ee hay'adaha kale ee hantidhawrista sare (SAls).

Guulaha muhiimka ah waxaa ka mid ah iskaashiga lala yeeshay xubnaha ARABO-SAI ee bulshada Carabta ee La-dagaallanka Musuqmaasuqa. Sidoo kale, XHG waa hay'addii ugu horreysay ee Soomaaliyeed ee xubin ka noqota kuna biirtay guddigaas. Intaa waxaa dheer, XHG waxuu la shaqeeyaa hay'ado caalami ah sida AFROSAI-E, IDI, Bangiga Adduunka, iyo Midowga Yurub si loo horumariyo Mihnadda baarista iyo hufnaanta shaqada.

Iskaashigaan wuxuu gacan ka geystaa xoojinta wada-shaqeynta daneeyayaasha gudaha iyo dibadda, adkaynta isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta, iyo taageeridda horumarka iyo dowlad-wanaagga muddada fog ee dalka. Casharradii laga bartay iyo xiriirradii la dhisay sanadkii 2025 waxay dhiseen saldhig adag oo lagu sii wadi karo horumar joogto ah iyo hay'ad wax ku ool ah.

6.1. Mashruuca Taageerada XHG ee Hay'adaha Dhiggeena ah

IDI iyo AFROSAI-E ayaa hirgeliyay Mashruuca Taageerada Iskaashiga (Peer Support Project – PSP) ee XHG, kaas oo ah hindise iskaashi ah oo lagu maalgeliyay Safaaradda Boqortooyada Norway (Royal Norwegian Embassy). Bishii Sebtembar 2025, XHG waxa uu si rasmi ah u saxiixay Heshiiska Iskaashiga Mashruuca Taageerada Iskaashiga (PSP) ee muddada 2025–2027. Tani waxa ay calaamad u noqotay guul muhiim ah oo u soo hoyatay XHG iyo Mashruuca PSP, taas oo xoojisay iskaashiga caalamiga ah ee joogtada ah ee lagu taageerayo xoojinta awoodda hay'adda.

Iyada oo laga duulayo hirgelinta guusha leh ee Mashruuca PSP muddadii 2023-2024, iyo XHG oo iskaashi la leh daneeyayaasha daladda INTOSAI, oo ay ku jiraan AFROSAI-E iyo IDI, ayaa ku heshiisay in la sii wado iskaashiga muddada 2025-2027. Iskaashigan la cusboonaysiiyay waxa uu ujeedkiisu yahay taageeridda gaaridda natiijooyinka istiraatiijiga ah ee XHG, gaar ahaan dhinacyada bixinta hantidhawrka aasaasiga ah iyo ka-qaybgalka daneeyayaasha.

Guud ahaan, iskaashiga caalamiga ah ee hay'adaha hantidhawrka ee is taageeraya (peer-to-peer cooperation) waxa uu ka qayb qaatay xoojinta awoodda XHG ee bixinta hantidhawr tayo sare leh oo waafaqsan heerarka caalamiga ah, haggajinta dabagalka talooyinka hantidhawrka, iyo kor u qaadidda daahfurnaanta, isla xisaabtanka, iyo maamul wanaagga si ay uga faa'iideystaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

6.2. Xafiiska Hantidhowrka Qaranka Iswiidhan

Sannadkii labaad ee iskaashiga u dhexeeya Xafiiska Hantidhawrka Qaranka ee Sweden iyo Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (XHG), kaas oo si rasmi ah loogu dhisay Heshiis Is-afgarad (MoU) oo la saxiixay bishii May 2024, ayaa horumar weyn laga sameeyay xoojinta awoodda XHG si ay u noqoto hay'ad hantidhawr sare oo madax-bannaan oo lagu kalsoonaan karo.

Iskaashigan, oo socon doona ilaa 30 Juun 2029, waxa uu diiradda saaray xoojinta daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka maareynta kheyraadka dadweynaha, gaar ahaan dhisidda awood adag oo ku saabsan hantidhawrka waxqabadka (performance audit). Sannadkan, tababaro wax ku ool ah iyo hagitaan shaqo (on-the-job guidance) ayaa la siiyay shaqaalaha XHG, si loo hubiyo hirgelinta dhabta ah ee heerarka iyo hababka hantidhawrka waxqabadka.

Sidoo kale, qorshaynta suurtagalnimada kordhinta heshiiska MoU iyo wajiga xiga ee mashruuca waxa ay bilaaban doontaa hal sano ka hor dhammaadka heshiiska hadda jira, iyadoo lagu salaynayo heshiis wadajir ah.

6.3. Bankiga Adduunka

Sannadka 2025, waxa uu ahaa xilli ay kordheen taageerada iyo horumarka hay'adeed ee XHG, taas oo inta badan ka dhalatay iskaashiga joogtada ah ee Bangiga Adduunka (WB). Bangiga Adduunka waxa uu kordhiyay joogitaanka La-taliyaha farsamo oo baarista Waxqabadka oo la bilaabay 2024, isla markaana, iyada oo loo marayo Mashruuca Hagaajinta Maareynta Kheyraadka Dadweynaha ee Soomaaliya (SERP), waxa uu fuliyay qiimeyn dhammaystiran iyo qorshayn ku saabsan xafiisyada hantidhawrka guud ee Soomaaliya oo dhan.

Sanadkii 2025, waxaa la gabagabeeyay qiimeyn dhammaystiran oo lagu sameeyay XHG, taas oo lagu eegay lix qaybood oo muhiim ah: madax-bannaanida iyo qaab-dhismeedka sharciyeed, maamulka gudaha iyo anshaxa, tayada Baarista iyo warbixinnada, maareynta maaliyadda, hantida iyo adeegyada taageerada, iyo sidoo kale Maareynta shaqalaha, tababarka, isgaarsiinta iyo daneeyayaasha.

Inkasta oo qiimeyntu bixisay aragti guud oo ku saabsan karaanka hay'adeed, haddana baahiyaha iyo daldaloolooyinka la aqoonsaday waxay u baahan yihiin tallaabooyin dheeraad ah iyo hirgelin qorshaysan sanadaha xiga. Natiijooyinka qiimeynta waxaa loo adeegsanayaa hagidda casriyeynta XHG iyo mudnaanta kobcinta karaanka hay'adda.

Natiijooyinka qiimeynta ayaa loo adeegsanayaa dejinta mudnaanta casriyeynta iyo dhismaha awoodda XHG. Rubucii afaraad ee 2025, XHG waxaa u bilowday mashruuc dib loogu eegayo lagu horumarinayo, laguna mideynayo dokumentiyada shaqada ee XHG. Hawshan ayaa daboolaysay ku dhowaad 50 dokumenti, kuwaas oo ujeeddadoodu tahay in lagu mideeyo habraacyada shaqo, la hagaajiyo hubinta tayada, isla markaana la xoojiyo qaab-dhismeedka howlagalinta hay'adda.

6.4. Midowga Yurub (EU SFA TA)

Mashruuca Taageerada Farsamo ee La-xisaabtanka Maaliyadeed ee Soomaaliya ee Midowga Yurub (EU SFA TA) waa hindise muddo dheer soconaya oo himilo sare leh, kaas oo ujeedkiisu yahay xoojinta awoodda hay'adeed si kor loogu qaado waxtarka waaxyaha hantidhawrka iyo hagaajinta tayada hantidhawrka guud ahaan Soomaaliya. Barnaamijkan oo dhinacyo badan leh waxa uu taageeray noocyo kala duwan ee baarista ah, oo ay ku jiraan baarista maaliyadeed, u-hoggaansanaanta, iyo baarista gaarka ah.

Sannadkii 2025, mashruuca EU SFA TA waxa uu sii waday horumarkiisa isagoo ah hindise muddo dheer soconaya oo loogu talagalay xoojinta karaan hay'adeed iyo hagaajinta waxtarka waaxyaha XHG. Barnaamijku waxa uu taageeray noocyo kala duwan oo baaris ah, oo ay ku jiraan baarista maaliyadeed, u-hoggaansanaanta sharciga, iyo baaraista gaarka ah, isaga oo sidoo kale bixiyay taageero farsamo oo gaar ah oo loogu talagalay XHG ee Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah dowlad goboleedyada.

Intii lagu jiray sannadka, mashruucu waxa uu sidoo kale keenay la-taliye farsamo ee dhanka maareynta shaqaalaha ah (HR Advisor) si uu u taageero horumarinta shaqaalaha, hagaajinta maamulka shaqaalaha, iyo hubinta sii jiritaanka dadaallada dhisidda Karaanka. Sidoo kale, mashruucu waxa uu bixiyay taageero farsamo oo toos ah oo loogu talagalay Xafiisyada Hantidhowrka Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah dowladda Federaalka.

6.5. Bangiga Horumarinta Afrika (AFDB)

Rubucii afaraad ee sanadka 2025, Xafiiska XHG wuxuu xoojiyay dadaalladiisa horumarineed isagoo kaashanaya Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB), kadib wada hadallo guul leh oo dhex maray labada dhinac. Iskaashigan ayaa horseeday hawlgelinta saddex la-taliye oo muddo gaaban ah (afar bilood), kuwaas oo bixiyay taageero farsamo oo si gaar ah diiradda u saaran iyo kor u qaadidda karaanka hay'adda ee meelaha muhiimka ah ee hawlgalka.

Intaa waxaa dheer, waxaa la bilaabay qorshe mashruuc oo soconaya muddo hal sano ah, kaas oo diiradda saaraya hawlo aan toos ula xiriiirin baarista, si uu u xoojiyo shaqooyinka aas-aasiga ah ee XHG. Mashruucan wuxuu gacan ka geysanayaa xoojinta Karaanka hay'adeed, horumarinta siyaasadaha iyo habraacyada shaqo, iyo kor u qaadidda aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaha, si waafaqsan himilooyinka istiraatiijiyadeed ee xafiiska.

iskaashigan wuxuu muujinayaa ka go'naanta XHG ee ku aaddan ka faa'iidaydiga iskaashiyada caalamiga ah si loo xoojiyo dowlad-wanaagga, isla-xisaabtanka, iyo hufnaanta hawlaha dowladda. Faahfaahinta la xiriirta habka wadahaadallada, baaxadda mashruuca, iyo hawl-gelinta la-taliyayaasha ayaa si gaar ah loogu dii-waangeliyay qaybta iskaashiga OAGS iyo AfDB.

Kulamada iyo Dhacdooyinka Muhiimka ah ee 2025

Sannadka 2025, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu si firfircoon uga qayb qaatay kulamo, shirar, iyo munaasabado muhiim ah oo heer gobol iyo heer caalami ah. Ka-qaybgalkaasi waxa uu ka qayb qaatay xoojinta iskaashiga caalamiga ah, is-dhaafsigaa aqoonta iyo khibradda, iyo kor u qaadidda doorka Xafiiska ee fagaarayaa-sha mihnadeed ee heer gobol iyo heer caalami. Dhacdooyinka ugu muhiimsanaa waxaa ka mid ahaa:

1. Shirkaa 21aad ee Guddiga Maamulka AFROSAI-E iyo dib-u-eegista istiraatiijiyadda 2025, oo la qabtay dalka Seychelles intii u dhexeysay 19–20 May,.
2. Saxiixa heshiis iskaashi ee u dhexeeyey Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Soomaliya iyo Maxkamadda Xisaabadaka Turkiga (TCA), oo dhacay 7 Luulyo 2025.
3. XHG ayaa ka qayb qaatay tirakoobka sannadlaha ah ee agabka iyo hantida ee Bulshada Bariga Afrika (EAC) ee sanad-maalayadeedka 2024-2025, kaas oo ku dhammaaday 30 Juun 2025.
4. XHG ayaa ka qayb galay shirka INCOSAI oo lagu qabtay Sharm El-Sheikh, Masar, intii u dhaxaysay 29 Oktoobar ilaa 5 Nofeembar.
5. XHG ayaa ka qayb galay Madasha Saddexaad ee Carabta ee kor u qaadista daahfurnaanta iyo la-dagaallanka musuqmaasuqa xilligii dijitaalka, oo lagu qabtay Qaahira 23 Oktoobar 2025.
6. XHG ayaa ka qayb galay Shirweynaha Guud ee ARABOSAI oo lagu qabtay Sacudi Carabiya, 1– 4 Diseembar.
7. XHG ayaa ka qayb galay kulanka labaad ee khabarada sharciga ee AFROSAI-E.
8. XHG ayaa ka qayb galay shir ku saabsan deymaha dadweynaha oo lagu qabtay Togo, kadib casuumaad ka timid Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB).
9. XHG ayaa ka qayb galay kulankii 47aad ee caadiga ah ee Bulshada Bariga Afrika (EAC).
10. XHG ayaa ka qayb galay barnaamijka Mastery Initiative ee Madrid, oo ay martigelisay SAI Spain.
11. XHG wuxuu ka qaybgalay Shirweynaha Caalamiga ah ee Maareynta Deymaha.

Guud ahaan, kulamadan iyo dhacdooyinkan muhiimka ah waxa ay xoojiyeen joo-gitaanka iyo muuqaalka Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS ee fagaarayaasha mihnadeed, waxa ayna gacan ka geysteen horumarinta iskaashiga hay'adaha dhig-ga ah, kor u qaaddida aqoonta iyo waayo-aragnimada shaqaalaha, iyo xoojinta ku dhaqanka hababka iyo heerarka caalamiga ah ee hantidhowrista.

7. HORUMARINTA KARAANKA

Dhismaha Karaanka iyo kobcinta shaqaalaha waxay ahayd mudnaanta koowaad ee hay'adda intii lagu jiray sannadkii 2025. Xafiisku waxa uu hirgeliyay tababaro kala duwan iyo aqoon-is-weydaarsiyo xafiiska gudahiisa ah, heer gobol, iyo heer caalami ah si kor loogu qaado kartida shaqaalaha, si sare loogu qaado tayada baarista, loona xoojiyo waxqabadka hay'adda, iyada oo la waafajinayo Qorsho waxqabadka ee Sanadlaha ah.

Guud ahaan, 19 tababar ayaa si guul leh loo fuliyay sannadka gudihiisa. Tababarada dhismaha karaanka ugu muhiimsan ee qabsoomay waxaa ka mid ah tababarrada baarista waxqabadka, baarista u-hoggaansanaanta sharciga, isbeddelka dhijitaalka ah, kormeerka IFMIS, baarista warshadaha macdanta iyo khayraadka dabiiciga ah, xiriirka daneeyayaasha, iibka, iyo maaraynta istiraatiijiyadda. Tababarradaan qabsoomay waxa ay kor u qaadeen xirfadaha farsamo, waxa ay fududeeyeen la qabsiga nidaamyada dhijitaalka ah, sara u qaaddida la-hawgalka daneeyayaasha, maaraynta istaraatiijiyadda iyo tayada warbixinta.

Tababarradan waxay si weyn uga qayb qaateen horumarinta aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaha ee dhinacyada heerarka baarista, maamulka gudaha, nidaamyada ICT-ga, isgaarsiinta, iyo hoggaaminta.

Hawlahaas jadwalaysnaa waxaa ka mid ahaa 11 tababar oo aan qabsoomin saba-bo la xiriira caqabad la xiriira xaddidaado miisaaniyadeed, awoodda tababar-bixinta oo kooban, isku aadka jadwalka shaqada, iyo isbeddel ku yimid barnaamijyada tababarka heer gobol iyo heer caalami. Meelaha hortabinta leh oo ay saameeyeen waxaa ka mid ah baarista nidaamyada macluumaadka, amniga internetka (cyber-security), tababaro sare oo baarista gudaha ah, iyo aqoon-is-weydaarsiyo la xiriira maamul wanaagga.

Hawlaha dhisidda karaanka ayaa daboolay waaxyo kala duwan, oo ay ku jiraan baarista waxqabadka, nidaamyada macluumaadka, baarista maaliyadda, baarista u-hoggaansanaanta sharciga, horumarinta shaqaalaha, maamulka iyo maaliyadda, qorshaynta, maareynta tayada, iyo baarista gudaha. Tani waxa ay fududaysay in horumarinta xirfadaha si dheellitiran uga hirgasho dhammaan waaxyaha baarista iyo kuwa kale.

Waxaa xusid mudan in XHG oo ka duulayaa horumarinta karaanka u lawadaagay Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka (XHG-DXDF) barnaamijyo waxbarasho oo la xiriira horumarinta xirfadaha shaqaalaha oo ay kamid tahey Waxbarashada mihnadeed ee Hantidhawrista (PESA).

Sii sare loogu qaado natiijada horumarinta karaanka, xafiiska waxa uu xoogga saari doonaa in uu horay usii qorsheeyo tababarrada loo baahan karo, iyadoo meelaha hortabinta leh ay ka mid yihiin nidaamyada macluumaadka, baarista amniga internet, xoojinta xiriirka bahwadaagta, sare u qaadidda dabagalka saamaynta tababar-rada ay ku leeyihiin waxqabadka.

Barnaamijka horumarinta xirfadda waxa uu ku dhisnaa saddex tiir iskaabaysa oo kala a tababarrada gudaha iyo Mihnadda, Shaqo ku tababarasho, iyo aqoon-isweydaarsiyo heer gobol iyo heer caalami ah.

Shaqo ku tababarasho

Dadaalladan Shaqo ku tababarashada oo tiir muhiima u ah istaraatiijiyadda horumarinta karaanka waxaa loo qaabeeyay in lagu xoojiyay kartida shaqaalaha iyadoo loo marayo waxbarasho gacanta ah xilliga shaqada socoto, iyada oo la hubinayo in si toos ah loo raacay heerarka iyo habraacyada iyo hababka waajibaadka baaris ee dhabta ah.

Dadaalladaan waxa ay door muhiim ah ka cayaareen la qabsashada joogtaynta horumarinta xirfadaha, sare u qaadidda baarista waxqabadka, xoojinta waajibaadka xafiiska ee ah in lasoo saaro natiijooyin baaris tayo-sare leh la iskuna hallayn karo.

Aqoon-is-weydaarsiyo Heer Gobol iyo Heer Caalami

Xafiisku waxa uu si firfircoon uga qayb qaatay barnaamijyo iyo aqoon-is-weydaarsiyo heer gobol iyo caalami ah oo lagu dhiirigelinaayo in wax laga barto hay'adaha an jaal ka nahay, in la qaato dhaqamada hirgalay. Dadaalladaas waxaa ka mid ah aqoon-isweydaariyo ku aadan maareynta tayada, xiriirka iyo la-halgalka daneeyayaa-sha, horumarinta shaqaalaha, isbeddelka dhijitaalka, iibka, iyo baarista yoolalka horumarka waara. Ka-qaybgalka aqoon-isweydaarsiyadaas waxa ay kor u qaaday fahamka shaqaalaha arrimaha baarista ee soo cusboonaada, xoojinta iskaashiga heer gobol, iyo in ay xoojiyeen waafajinta heerarka caalamiga ah iyo dhaqamada hirgalay.

Mihnadeyn

Xafiiska waxa uu joogteeyay in uu xoojiyo karaanka hay'adda iyada horumarinayo mihnadda shaqaalaha, laguna xoojinayo shahaadooyin mihanadeed oo heer caalami la aqoonsanahay. Dadaallada ayaa diiradda saaraya xoojinta tayada baarista, sare u qaadista u-hoggaansanaanta heerarka caalamiga ah iyo dhisidda shaqaale karti leh, la isku hallayn karo oo takhasus u leh shaqadooda. Ugu yaraan sideed (8) ka mid ah shaqaalaha ayaa helay shahaadooyin mihanadeed sida shahaadada hantidhowraha Fatasha khiyaanada (CFE) halka labo ka mid ah shaqaalaha ay qaateen shahaadada Hantidhowraha Nidaamka Macluumaadka (CISA) iyo mid oo helay Shahaadada Kharashka Dadweynaha iyo Xisaabtanka Maaliyadeed (PEFA). Xafiiska waxaa ka go'an inuu ballaariyo fursadaha shahaadooyinka mihnadeed oo ah wadiiqo istaraatiijadeed oo lagu joogtaynayo tayada baarista laguna jaanqaadayo dhaqamada hirgalay ee heer caalami.

MEELAHA UGU MUHIIMSAN EE XOOJINTA KARAANKA:

› Tayada Baarista iyo Waxtarka Mihnadda

Waxaa ahmiyad gaar ah la siiyay xoojinta tayada baarista, u-hoggaansanaanta heerarka iyo helidda shahaadooyinka mihnadeed, shaqaalaha oo ka qeyb-qaatay baarista wadajirka ee yoolka horumarka waara, tababarrada baarista waxqabadka, baarista warshadaha macdanta iyo khayraadka dabiiciga ah, tababarka dib-u-eegista xakamaynta tayada (Heerar 1-3). Barnaamijka shahaadada hantidhowraha Fatasha khiyaanada (CFE) ayaan wax weyn ka taray horumarinta mihnadda iyo qorshaha shaqaale-isku-badelidda ee howlaha baarista. Tababarradaan waxa ay sare u qaadeen karaanka shaqaalaha ee ku saabsan qorshaynta barista, fulinta, warbixinta iyo hubinta tayada si waafaqsan heerarka caalamiga ah iyo hagayaasha XHGS.

› Isbeddelka Dhijitaalaynta iyo Karaanka ICT

Tababaro la xariira ICT, maamul wanaagga dijitaalka ah, iyo hoggaaminta isbeddelka ayaa sare u qaaday awoodda hay'adda ee adeegsiga teknoolojiyadda iyo qalabka dijitaalka ah.

› Maareynta Maaliyadda iyo korjoogtaynta nidaamyada guud.

Tababaro la xiriira aqoon-is-waydaarsi ku saabsan korjoogtaynta iyo dib-u-eegista IFMIS-ka iyo iibka, ayaa kordhiyay fahamka nidaamyada maaliyadda, xakamaynta iyo kmhataraha ayaa xoojiyay baaxadda baarista ee qarashaadka guud iyo hanaanka iibka taas oo sare u qaaday tayada hantidhawrista.

› Xariirka, la-hawlgalka Daneeyayaasha iyo Warbixinta

XHGS waxaa hortabin u leh Xiriirka iyo la-hawlgalka daneeyayaasha, sidaa awgeed waxa uu xoojiyaa in shaqaalaha ay ka qayb-noqdaan nuxurka warbixinnada dhijitaalka ah iyo tababarka warbaahinta, iyo sidoo kale aqoon-isweydaarsiyada gobolka ee ku saabsan xiriirka iyo la-hawlgalka daneeyayaasha ee saamaynta warbixinta. Hawlahan waxa ay xoojiyeen awoodda hay'adda ee gudbinta natiijooyinka baarista, la-hawlgalka daneeyayaasha iyo sara u qaadista saamaynta shaqada hantidhowrka.

› Hoggaaminta, Maamulka, Xoojinta Awoodda Hay'adda

Dadaallada horumarinta karaanka ayaa diirada lagu saaray hoggaaminta, maamulka istaraatiijiyadda, maaraynta tayada iyo maamulka. Shaqaalaha ayaa ka qaybgalay tababarka maamulka istaraatiijiyadda, aqoon-is-weydaarsiyo heer gobol ah oo la xiriira horumarinta shaqaalaha iyo maaraynta tayada. tababaraddan ayaa wax weyn ka taray sare u qaadista xirfadaha maamulka, hab-dhaqanka maamulka hay'adeed, iyo nidaamyada maaraynta tayada gudaha. Sidoo kale waxa uu xafiska ku tala jiraa in uu dardargaliyo horumarinta habraacyada baarista, aaladaha baarista dhijitaalka ah, kobcinta hogaaminta iyo in si joogta ah looga qeybgalo dadaalada mihnadeed ee heer gobol iyo mid caalami.

8. CASHARRADA LA BARTAY

Hirgelinta hawlihii la qorsheeyay sanadka 2025, waxa ay bixiyeen casharro muhiim ah oo ka caawinaya XHG qorshaynta mustaqbalka iyo hawl-fulinta. Casharrada la bartay ayaa si toos ah ula jaanqaadaya ujeedooyinka xafiiska ee Qorshaha Istaraatiijiyeed ee 2023-2027, waxa ayna hagayaan tallaabooyin wax toosiya oo ku aadan xoojinta wax-ku-oolnimada hay'adda, tayada baarista, iyo joogtaynta horumarka.

Iyada oo laga falcelinayo caqabadaha la xiriira dhaqaalaha iyo waxqabadka ee lala kulmay sanadka, XHG waxa uu qaaday tallaabooyin istaraatiijiyadeed wax-ku-ool ah, oo ay ka mid tahay dib-u-eegista guud ee bartamaha sanadka ee lagu samaynayo qorshaha howleedka. Hannaankaan waa mid dib u habeen, hagaajin, mudnaansiin lagu samaynayo hawlaha si loo xoojiyo dadaallada saamaynta togan leh inta lagu guda jiro sanadka 2025, iyada oo loo gogol xaarayo in la fuliyo sanadka 2026.

Isbeddellada muhiimka ah ee la sameeyay iyo qorshaha horey loo eegayo waxaa ka mid ah:

1. In la dedejiyo hirgelinta nidaamka maareynta qandaraasyada, lana hubiyo in lagu xiro nidaamka maareynta macluumaadka guud ee XHG, ee mashruuca SERP. waxaa si gooni ah diirada loo saarayaa horumarinta mareegta Xafiiska si xogta loo fududeeyo iyo in dadweynuhu si sahlan ku helaan.
2. In la dhammaystiro hagayaasha baarista ee qabyada ah sida hagaayaasha baarista ee nidaamyada macluumaadka, fatashka iyo waxqabadka, hawlgelinta istaraatiijiyadda tiknoolajiyadda, istaraatiijiyadda xiriirka iyo la-hawlgalka daneeyayaasha, qaabdhismeedka dabagalka iyo qiimeynta, iyo siyaasadda maareynta khataraha, iyadoo loo marayo aqoon is-waydaarsiyo iyo tababaro dhisidda karaanka ah.
3. In la xoojiyo mihnadda shaqaalaha, iyada oo la siinayo tababaro farsamo iyo shaadooyin caalami ah sida (Baarista Gudaha, CPA, ACCA, CISA, CFE,), iyadoo ay dhinac socoto diyaarinta qaab-dhismeedka noocyada dallacaadaha shaqada barnaamijyo hagitaan.
4. In la xoojiyo xiriirka lala leeyahay baarlamaanka, Xafiisyada hantdhowr ee dowlad goboleedyada, iyo bahwadaagta kale ee xafiiska si loo kordhiyo kalsoonida iyo wada-shaqeynta iyo dadaallada wadajiro oo ay ka mid yihiin in la helo wada-shaqaynta iyo fursadaha aqoon-is-weydaarsi ee xafiisyada assaagga ah.
5. In la rasmi ah loo raadiyo taageero dhaqaale si loo daboolo baahiyaha jir ee la xiriira hawlaha hortabinta leh, gaar ahaan mashruuca SERP, iyo bah-wadaag kale, si ay u suurtagasho in la hirgeliyo istaraatiijiyadda 2023-2027 ee XHGS.

Guud ahaan, casharrada laga bartay sannadka 2025 waxa ay muujinayaan muhiimadda ay leedahay dabacsanaanta qorshaynta, mudnaan siinta hawlaha saameynta leh, xoojinta nidaamyada gudaha, iyo sii wadidda dhisidda karaanka hay'adda, si Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS u sii xoojiyo gudashada waajibaadkiisa si hufan oo waxtar leh.

Casharada Hay'addu Baratay ee u Baahan Hormarinta.

Iyada oo laga duulayo caqabadaha iyo waayo-aragnimada hawlgalladii 2025, XHGS waxa uu aqoonsaday qodabada soo socda si loo xoojiyo waxqabadka mustaqbalka:

1. Baahida loo qabo hab abaabul kheyraad oo firfircoon oo kala duwan ayaa muhiim ah. Waxaa ka mid ah xoojinta iskaashi lala yeesho Bah-wadaagta horumarinta, sahaminta fursadaha deeqaha gudaha, iyo sare u qaadista hab-dhaqanka iyo qorsheynta maaliyadda gudaha.
2. Joogtaynta horumarinta karaanka shaqaalaha ayaa weli ah mid muhiim u ah hagaajinta tayada baarista iyo wax-ku-oolnimada hay'ada.
3. Bixinta dadaallo istaraatiijiyadeed oo wax-ku-ool ah waxa ay u-baahantahay qaab-dhismeed xoogan oo maareynta mashaariicda ah, sida in la helo jadwal si cad loo qeexay, hoggaan u heellan mashaariicda, iyo habab adag oo kormeer iyo qiimeyn ah si loola socdo horumarka loona maareeyo khataraha.
4. waxa muhiim ah la-hawlgal wanaagsan oo lala yeesho baarlamaanka, hay'adaha la baaro, bulshada rayidka ah, iyo bahwadaagta caalamiga ah. sidoo kale xiriir toosan, hababka falcinnada iyo dadaalada wada-shaqeynta ayaa xoojinaya saameynta, kalsoonida iyo wax-ku-oolinnamada shaqada XHGS.
5. in la sii balaariyo horumarinta xirfadaha iyo tababarada shaqaalaha Xafiisyada Hantidhowka Guud ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka (XHGD-XDF) sidoo kale in lagu taageero agabyada muhiimka u ah socoshada hawlaha shaqada.

9. QORSHAHA XIGA IYO HORTABINNA-DA ISTARAATIJIYADDA

Sannadka 2026, Xafiiska wuxuu hirgelin doonahawlo hortabin leh oo loo kala saaray shan hawlgal oo muhiim ah oo hawlaha xafiiska.

Hawlaha baarista waxaa diiradda lagu saarayaa baarista maaliyadda, u-hoggaansanaanta sharciga, nidaamyada macluumaadka, waxqabadka iyo baarista gaarka ah ee dhammaan hay'adaha dowladda federaalka ah, iyada oo la raacayo sharciyada khuseeya iyo heerarka caalamiga ah.

Hawlaha hubinta tayada waxa ay xoojinayaan tayada baarista iyada oo loo marayo dib-u-eegis hore ah (kulul) iyo dib-u-eegis danbe (qabow), dabagal ku saabsan farqi-ga soo baxay, iyo xoojinta adeegsiga hagayaasha iyo habraacyada baarista. Horumarinta karaanka waxa ay mudnaanta siinaysaa tababarada mihnadeed, taageerada shaqada gudaheeda iyo kulamada aqoon-is-weydaarsiga si loo xoojiyo kartida shaqaalaha iyo waxqabadka hay'adaha.

Hawlaha taageerada nidaamyada iyo tiknoolojiyada (ICT) waxa ay horumariyaan wax-ku-oolnimada baarista iyada oo la casriyeynayo kaabayaasha tiknoolojiyada

(ICT), helitaanka aaladaha baarista, xoojinta awoodaha dhijitaalka ah iyo baarista fatashka.

Hawlaha la xiriira maaraynta iyo anshaxa waxa ay xoojiyaan hannaanka isla xisaabtan-ka iyada oo loo marayo tababarka anshaxa, taageerada hababka korjoogtaynta, iyo hindisayaasha kor u qaadaya hirgelinta wax-ku-oolka ah ee talooyinka baarista.

Hawlaha la xiriira la-hawlgalka daneeyayaasha waxa ay xoojinayaan hababka korjoogtaynta, la-hawlgal qaabaysan oo ay la socoto taageerada Baarlamaanka, iskaashiga xukuumada iyo hay'addaha dowladda, gacan-saarka dadweynaha iyo bulshada rayidka ah, wada-shaqayn iyo is-dhaafsi khibradeed oo u dhexeeya XHGS iyo XHG-DXDF iyo xiriirada caalamiga ah. Dhammaan hawlahaas waa kuwo la jaan-qaadaya qorshaha istaraatiijiyada 2023-2027.

10. KHAYRAADKA MAALIYADDA

Baarlamaanka Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ansixiyay miisaaniyadda la qoondeeyay, taas oo saldhig u noqotay diyaarinta miisaaniyadda XHG ee 2025. Qaab-dhismeedka miisaaniyadda XHG waxa uu ku meeleeeyay dhammaan dakhliga iyo kharashaadka madaxyo iyo madax-xigeenno u gaar ah, si waafaqsan qaab-dhismeedka Miisaaniyadda Qaranka. XHG waxa uu si joogto ah u cusbooneysiisay ni-daamyada maareynta maaliyadda ee muhiimka ah si ay u fududeyso soo gudbinta warbixinno heerar kala duwan leh, laga billaabo macaamil kasta oo shakhsi ah illaa waxqabadka guud ee XHG.

Sanad maaliyadeedka dhammaaday Diseembar 31, 2025, XHG waxa uu wada isticamaalay miisaaniyaddii loo qoondeeyay. Tani oo muujineysa heerka aadka u sarreeya ee isticmaalka miisaaniyadda oo ku dhow 100%.



OFFICE OF THE AUDITOR GENERAL OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Mogadisho, Somalia

www.oag.gov.so  |  oag@oag.gov.so

